

NABIILADA CUDURRADA

Xasan Salaad Macallin Alcaadii

Muqdisho-Soomaaliya

alcaadii@gmail.com

Daabacaadda koowaad

1443 – 2022

Inta qaldan anaa eedda ku leh saxana eebbaa leh

HORDHAC

Suugaanta waa diiwaan sugan oo lagu keydiyo dhacdooyinka iyo aqoonta, waana habka ugu wanaagsan ee wax lagu gudbinkaro, inta la ogyahay diinwaankaasi waxaa si weyn u adeegsaday suugaanyahannadii carbeed oo suugaanta afka carabiga ku keydiyay aqoonta ama cilmiga qeybihiisa kala duwan sida luqadda, fiqhiga, taariikhda, dhaqanka, maadda iyo xikmadda, balse dadka ku hadla afafka kale suugaantoodu diiwaan ahaan uma aysan adeegsanin marka laga reebo ammaan, cay, faan ama tookh iyo maddaddaalo, taasi oo haddii tusaale loosoo qaato soomaalida, suugaantii ka dhigtay maadeys iyo wax la isku ammaano ama la isku caayo kaliya, ilaa heer ay gaartay qofka tix sameeyo sikasta oo ay murti u leedahay xaqiiqana u tahay loo qaadanayo sida qof maad ama majaajillo sameynaya, oo kaliya loo sacbinayo loona qoslayo, haddii uu soo jeediyo digniinno ama talooyin, waxaa laga soo qaadayaa qof riwaayad dhigaya oo kale, illeen riwaayaddu ma aha wax xaqiiqa ah, sidaas darteed waxa aan isku dayay in tixdani aan mariyo waddo taasi ka baddalan oo labada dhinac ka cusub oo ah tix cilmiyeed iyo tix diiwaaneed, tixdaasi oo ku imaandoonto qaab duca ama alla bari ah.

Magaca buugga ee ah "Nabiilada Cudurrada" si kooban, macnahiisu waa "Tix Cilmiyeysan" ama "Tix Cilmiyeed".

Buuggan waxa aan ku soo guuriyay cudurrada ku dhaca aadanaha oo iskugu jira cudurro si caalami ah u diiwaan gishan iyo cudurro soomaalida u gaar ah magac ahaan ama jiritaan ahaan intaba.

Marka loo fiiriyo tixda, cudur waa wax qofka sida uu rabo ama sida qumman si aanan aheyn ka dhigo, waxaana kamid ah xanuunnada, jirrooyinka, aafuoyinka, aafuoyinka, qaniinyada dhulsocotada iyo dugaagta, musiibooyinka dabiiciga ah, dhibaatooyinka, nafsiga, cuqdadda iyo dhaawacyada iwm.

Maadaama muhimadda tixdan ay qeyb ka tahay diiwaangalin cilmiyeed, haddii uu jiro cudur dhowr magac ku leh afka soomaaliga, waxa aan isku dayay in aan soo guuriyo dhammaan magacyadiisa, haddii uu yahay cudur magac qalaad ku caanbaxay oo soomalidana uu u leeyahay magac gaar ah, haddii magaciisa soomaaliga uu caan ku yahay soomaalida dhexdeeda, waxa aan ku gaabsaday magaciisa soomaaliga ah, haddii labadooduba ay caan ku yihiin soomaalida dhexdeeda, labaduba waan soo guuriyay, haddii uu yahay cudur aanan magac ku laheyn afka soomaaliga, waxa aan ku soo guuriyay magaciisii qalaad, waxaa dhicikarta in tixda aan ku soo guuriyo cudur si macna ahaan ah, kaddibna magaciisii aan ku xuso sharraxa cudurrada iyo qaamuuska, waxaa kale oo jira cudurro aad u tiro yar oo aan ku summadiyay *calaamaddan*, kuwaas oo magacyadoodaasi calaameysan aanan ku soo guurinin tixda, balse magacyadooda labaad ama seddexaad ama in ka badan aan ku soo guuriyay tixda, dhinaca kale, beydadka ama tuducyada kuma jiro mid ku xeran mid kale marka laga reebo hal tuduc, sikale haddii loo dhigo, beyd waliba sidiisa ayuu ku dhameystiranyahay mana ku xerno kan ka horreeya ama ka danbeeya, balse waxaa jirta in beydadka qaarkood cudurrada ku jira uu xiriir ka wada dhaxeeyo.

Cudurra ka mid ah cudurrada ku jiro tixda ayaa waxa aan tilmaan ama lar uga dhigay waxyaaba la xiriiro dhaqanka, xoolaha iyo dhirta soomaalida, taasi oo qeyb ka ah soo nooleynta kalmado uu sii liicayo isticmaalkooda.

Buugga waxa aan u sameeyay sharraxa cudurrada oo hab qaamuus ahaan ah ku imaanayo, waxaa dhicikarta in hal cudur oo dhowr magac leh, marka sharraxa la tago mid waliba aan siiyay sharraxiisii guud, aniga oo aanan ku gaabsanin mid kamid ah sharraxiisa oo kuwa kale aanan ku shaabbadeynin kaasi hore, arrintaasi waxa aan u sameeyay si cudur waliba waxa uu yahay asaga loogaga ag helo oo aanan looga raadinin meela kale.

Munaasabad iyo hordhac ahaan tixdan hoose ayaa halkan aan ku soo guuriyay.

In aan dhasho oo ley dhaqo oo aan sanado dheeldheelo

Dhowriyo toban in aan gaaro oo ay ii dhaxaan naago

Dhallaan badan in ay ii dhalaan aabbo i dhahaayo

Bangiyada fuluus aan dhigto oo aan xoolo dhaqanaayo

Dhabarkeygu uu soogodmo oo aan dhaafo todobaatan

Kaddib aan dhintoo ley dhaqoo ley dhex dhigo iilka

Dhaqaaliyo waxan dheef lahaa dhaxal ahaadaana

Nin dhintayow amaan dhowr kolkaa maalmo ku dhamaato

Magaceygi inta uu dhumo oo meesha lagu dhaafo

Dheeldheel wax loo dhigikariyo dhoobo ku ciyaarka

Dhalanteed carruur ay dhiseen waxba ma dhaafsiisna,

Iska dhalo kaddibna xoola dhaqo kaddib dhallaan beero

Wax dhaxal ah adoon reebin dhimo waa dhib nagu raagay

Halkaas ayey ku egtahay tixdaasi guubaabada ah.

NABIILADA CUDURRADA

Kan dhaacaadka anfaceynin ee macsi dhibaateynin
Kansar dhiigga dhuuqaaya iyo dhiigkar naga mooti
Dhinacdhaca wixii keena iyo aydhis soo dhuunta
Sokor dhacda, mar dheeraata iyo dhiigga wadna diida
Dhiig maskaxda kusii boodo iyo xididda dhuuqsooma
Sida jeerna dhimbil loo dhaweey kala dhaqaaqaaya
Dhaawac iyo bareellaata iyo naafo dhutineysa
Dhal dhalata jirkoo kala dhimani ama dhagoolowda
Ummi, dhaaya-laan iyo wixii cudud dhantaalaaya
Busbus dheeha saameeya iyo furuq ka dheereeya
Xasaasiyad dhexjiireysa jirka, dhaayahiyo dhuunta
Dhacdhac, jajab, dabeyl, neef-qabatin, qaaxo lala dhuubto
Dhimirbeelka, qoorgooye iyo dhullax sal aafeeya
Dhagdhagleynta wadnahoo dhaqsata, hoos u dhacda goorna
Dhimasha dhaw, kudkoo wali dhif ahi dhaqsa ku meyteeya
Teetano lays dhaafsiisan iyo qawid dhib weyn geysan
Dhiigdhiigga cirridkoo yirid ah, dhaban qalloocowga
Qallal lala dhacaayiyo cabeeb boogo laga dheefo

Dhaka iyo cambaartaa ku dhacda goobo laga dheehdo
Dhaysantariyo kaadidhiigga iyo qabsinka dheefshiidka
Dhiigyaaca, qufac, biiyo iyo xoqato dhuumeedka
Shuban fuuqbax dhalinaaya, wallac, cuncunka dharabowga
Ummulow, dhakaakiyo biyogal, dhakan, dacaardhiig, jac
Qaamowqashiirkaa ku dhaca dhabanka hoostiisa
Dhaandhaannimada, waalli iyo jinni dhawaaqaaya
Dhawaq-laan, shib dheeraata iyo fahan dhagxaanooba
Carrabkoo dhantaalmiyo codkoo shigshig ku dheehnaada
Dhalma-laan, dhibaatooyin qarsan, ragnimo dhimmanaata
Jabta, gale leh dheecaan hurdi ah dhalma la'aan keena
Cudur dumarka loo dhaafa iyo dhalma wixii raaca
Wax afkeygu dhibsanaayo oo aanan ku dhawaaqin
Dhilmaayada midkay keenta iyo dhaayamidibeeye
Dhilqe iyo xanuunnada kalee dhuudhi laga qaado
Tiifoow dhaxan leh, baabasiir sheegmo laga dhowro
Hergab dhuun xajiimeeya iyo duray dhuyuureedka
Karoonaaha sambabka dhaawacee neefta dhajinaaya
Cudur loo dhameynoo firkoo gaar ah ku dhacaaya
Dharag badan kan ay keenta iyo raashin dheef-laan ah

Dhiigyada midkood oo dhinmiyo cudurka dhiig-laanta
Killi dhagax fadhiistiyo markay gabta dhaqaaqeeda
Juudaanka laga dhuunta iyo baras dhalaalaaya
Dheecaanka jirka oo qaldama, dhabarka soo xoodmo
Kaalshibeelka, dhugma-laanta iyo buro dhammaanteed
Isfiillito, dhurwaayowga iyo dhaxanta burukiito
Dhool-cadeynta suus diida iyo qabatin dhowr nooc ah
Dhiig-goror, tufow, dhuuqsan iyo eeb dhallaan taabta
Daaco laysku dhibsanaaya iyo hingo dhamaaneynin
Dheedheera, daaf iyo bidhiga dhaaya xinjireeya
Dheefshiid-xumada, gaaska, jumbur, tuurta dhabarleyda
Dacar/qaras wax loo dhiga laheyn afka dhanaaneysa
Agool tinta kasoo dhaadhacee dhabanka soo gaara
Dalqa uu dhaqanku jarijiraye haatan la dhayaayo
Bidaartoo dhaxal ah, sheelo iyo hiir dheeraad ah
Hurda-laan dhafar ah, fiistulaha dhowr ahee raaga
Isnadaamis qoyskuu dhexgalo sahal ku dhaafeynin
Dhibbanaha xanuun uu ogeyn aayar u dhameeya
Istaroog dharbaaxa ah durbana dhimasho keenaaya
Naqas, faalij dhinac gaar ah rida ee dhagooleeya

Noog dhidid laheyn, jiiraggo'a, nabar leh dheecaanno
Cudurside xanuun dhaadhiciya, weersha dhinac eega
Dhakabiye, xabeeb iyo kojiye lala dhaqaaqeynin
Dhakafaar, walaac iyo dhuranka dhaawacaya maanka
Hamaansiga nabigu uu dhibsaday uu dhaliyo caajis
Hindhisada hal iyo dhaafta laba cudurna dhaafsiisa
Dhiigmadow, finiinaca ku dhaca harag dhammaantiisa
Goonjabkiyo dhafoor laxawga iyo dhiigga aan joogsan
Dhiig-caddaad, lalleemiyo wixii dhaliya bahalowga
Doofaarka duray laga dhaxliyo dhaqanka kaliyowga
Laabjeex dhanaan keena iyo matag dhamaaneynin
Sanboor uu dhibayo boorka iyo shoobbin lagu dhaashto
Asaasaqa duqowyada ku dhaca, riixa iyo dheebi
Dhajis il ah, kalaamiddiya, tarar, boogta dhoobeyda
Dhal-qallooca, gowracata iyo niyad-jab dheeraada
Lallabbada markay dhaxan dhacdiyo dheefta qaar keento
Dhiciinta dhallaankiyo findoob dheeha baddalaaya
Majiirkaa calooshiyo ku dhaca aagga dheefshiidka
Sirta dhowrsaneyd qaraw kashifa, buuni dhaayeedka
Madax-laxawga dhaxaltooyo ama dhiigga culusaada

Nabar dhaca calooshee dhaliya gaastarigga dhaaxa
Iskufuran kusii badan dhaddigga ee dhibkiisii leh
Inta suuli loo dhaadhacayo baxsad dhamaanaaya
Korostalool baruur ay dhaliso, dhagax-xameeteedka
Dhimashada khalaayaadka jirka, dhiillatiran-laanta
Abiteytka cuntadoo dhumio dhiciya miisaanka
Dhutin jiis ah, eernada la dhayin ee qalliin dhowrta
Koxatada ku dhacda dhaayahiyo hulaha dhuun eegta
Macluushiyo urugta ay dhaliso iyo dhacsaal, gaajo
Cirweynida dhargeyn iyo wixii dhuuniyee raaca
Il, katatbi, sixirka leysu dhigo aayar leysu dhiibo
Raashiinka aan kuu dhadhamin marna ku soo dhaafa
Wareentiyo bilhaarsiya dhufeyl biyo dhexdood jiifa
Kasoobaxa ku dhaca oogadiyo uurka dhexe hoose
Borostaata kaadida dhibtiyo dhuuqsan bintijiiddo
Ooddin dhabar ku taagmeysa iyo muruq dhasheedii ah
Bararisa faraha dhaawacdee uu dhaliyo jeermis
Koolba-aaryo/oofwareen la dhaha dhaxantu ay keento
Dhag-dhagleynta lafahiyo markuu bolola dhuuxoodu
Qabow daran qofkii uu ku dhaca gadaf ku dheeraata

Tuutuu' ku dhacda dhaayahiyo baarka dhakadiisa
Hammeelliso markay qorraxdu dhacdo gacanta soo dhiibta
Taws dhacsaal ah, Jaaw-qarrar, waraay, dhaaya kala leexsan
Xinjirowga dhiiggiyo qushqushka cunta is dhaaf-dhaaftay
Coonnimo dhererka caadigiyo dhumucda aan yeelan
Caloolfadhi dhallaankiyo dhammaan ku dhaca qaangaarka
Bu'a duumo ay dhalad yihiin toobin lagu dhuuqo
Liidaanyo dheef ama laqanyo dhaxani ay keento
Qandha-galti qofkii dhulka ku cusub soo dhaweyneysa
Caar qawid la dhaha, feexa, dabar, dhoosha digirkeeda
Dabdhulkiyo dhaleecada bushimo, qanjirka dhuuntowga
Geestaanka dhabarkiyo waswaas, dhuuri hiirtaanyo
Hoolata haddaan leyska dhufan tinta dhameyneysa
Weelduwaal xanuun dadka ka dhiga, goonni loo dhowro
Roobsugoow hilbowgiyo la dhasha roobka dhiciddiisa
Ardooyinka dhadhama doonka ahe dhaddigga saameeya
Wadaad iyo ayaan dhuuni iyo dhabato soo raaca
Arooraha gudbiya dhiigga oo dhumucda weyneysta
Bakaalkiyo bakoorada ku dhacda dhaayahiyo mooyda
Aafooyin dhaca, aaho, eel, dhaawda iyo boohin

Biinan ruuxa fadaqfadaq ka dhiga dhimirka baranooyo
Cagaarshowga qaarkiis dhib badan dhaawacaya beerka
Fooldiinka dhiddigood dhalaya foosha dhibiddeeda
Geestahanyo dhererkiyo ka dhinta lugaha dhumucdooda
Burobahal dhexgasha soohyadoo ka dhan ah burocaano
Holacyada dhammaan waaxyadiyo dhuuxa aan reebin
Majin dhuunta gasha ee cunaha dhibaya liqitaanka
Barraaqdiyo dhalow, gaade, xiiq, tiica dharasowga
Calwasaad dhibaataada dhaliso, dhadhabka iyo qoonka
Abeesow ku dhaca dugulka iyo dhaabbaliyo haaro
Beeryaro, dhalaad, dabaxaw, xasad, dhuuri iyo shaasho
Dhulbaraha xanuunnada ku badan, dhaafis iyo beerxaw
Caadada dhaddigga oo dhibtiyo marna is dhaafdhaafta
Adaddaaha dhakadaa sariyo dhuunta soo gaarta
Caallacaalla dhaqdhaqaaqa gaba, dhexda gunaad yaalla
Gasar dhabarka gala, iyo macaan, caajis riix dhowra
Fangaay iyo dhufeyl nagu dhex nool haddana na dhibaaya
Calool-angag dhajiya saxaradiyo cillinka dheeraanta
Afgaab soo dhaliyo boogo iyo nabra dhacaamaaya
Dabadhiig, magaag, seed, qaloon, sixasho, iin, dhiigbax

Arammida xanuun dheebi hore dhabna u soo raysan
Dhalalyiyo hafeefiyo lo'doon, jirriyo kaar dhaab ah
Caloolqabadka dheefshiidka iyo dhinacba goor aada
Dhanjaf, daal, dameerow, kix, bajo, ilqod, dhibiib, suuxdin
Dhuulacaso yamcuur dhadhan, fadhiid, dhamiyo emfiseema
Xundhur keena shuban dhiig leh iyo dhiig-dhac iyo lowgal
Dhabarjabshe, baruur, casir, ilmudka ilmada soo dhooba
Fadhi dheer curuqda uu dhaliyo, dhabarxanuun, eyddin
Dhiigmadowga, faraqarrarka iyo dhuldhac, urugo, saaris
Cuqdad dhibta qofkeedoo cid kale dhaawac gaarsiinin
Fadfad uu furuqu dhaafay iyo dhaawac muuqmuuqdo
Duufduuf hannaansocod dhumia, dhanqalan, dire, gaatir
Faje ama xanuun fuje la dhaha dhabarka qaanseeya
Gariir ay dhaxantu keenta, biiq, heec, dhacsaal juuc ah
Dhaadda ka kor lugyaro dhaawacdee dhererka saameysa
Sida geel dhukaan qaba fadaq ah ama hal dhuug raacay
Dhalanrogga histeeriya ku fudud ruux la dhaadhaamo
Ilfajaaska dhaayaha bararsha, fanto leh dheecaanno
Dhoys, gibilmadoobaad, jacjacle, dhowsnimiyo caallir
Fahmadarro, jan, dhoylaaw, laf-guri, dhirif, riyaax, shoog, mal

Cudur ay hayoomistu dhaliso dhuunta la abbaarta
Dementiya xasuusaha dhumisa dhimirka saameysa
Maraarnimada qofku uu ku dhasho ee ah dhimmanaansho
Idow, fikir, wareer, dhabannahays, dhudhummin jarribaad ah
Dhaddig uur leh jajabow ku dhaca goorkay sid dhawaato
Kabaabiyo dareemaha is dhima ama dhib soogaara
Dhaayaha galawkooma gala, haaruf candho dhaaftay
Hiimofiilya dhiigqubad ah ee dhaddigga loo uumin
Liinfooyinkoo dhammi, kirkirka, qarqaryo dhaxan keento
Meelanooma qorrax leysu dhigo dhaliso ee faafta
Goggob ruuxa qaba uu dhacdhaca, muqlo wax aan dhaamin
Cunabarar wax mara dhuunta iyo dhanyo xataa diida
Hurgumada markuu dhiig cabburma, barar dhammaantiisa
Maliil ruux tabari ay ka dhacday jirro ku dheeraatay
Beriberi badarka diir ka dhacay dhaliya iyo weydka
Neyuroosis dhaqan gaar ah lehe xaalad dhimireed ah
Dhabqalallo, maliilaca, lahanka, dhar iyo sulufaadka
Dhibib, shookad, uuryaal, bushiyo, faraggal, dhimmanaansho
Qabandhaco kolkay dhaxan jirtiyo dhaawac ku timaada
Mingis lagu dhabiibayo ciyaar daawo dhaqameed ah

Qaarxabaal dhulkaa hoose iyo dhiiqa leysku aaso
Boog-shiid dhaliso aashatiyo kooxda dhiig owda
Maqaardhaca muddada dheer socdee dhasha kusii xooggan
Buulallowga biya jirka dhex gala, nabarra soo dhaadan
Caafimaad-darrada dhirifka badan xoorka ka dhigaysa
Dheefsade, carsaanyow kansar ah waaxya u dhaqaaqa
Afdhalowga nabra soo dhaliya, afburbur dhaafsiisan
Bararshaha dhafoorkiyo wajiga, Baalcas dhadhab keena
Ilkadawaco micliyow la dhaha dhaqanku eemaalay
Si dhaqsa ah karood ruux u dila dhiilla aan yeelan
Mayiikada dhilleysiga ku ridda ruux is dhowreynin
Qob dhacsiga bellaagraha, cadanyo dhiinka lagu baanto
Shafta boogcalooleed dhalisa dhiigbax keeneysa
Cadgo' dhuunjin culus iyo hakiya jirka dhaqaaqiisa
Dhabateysi, taag, cunta-sumow, dhase, caddaad, quuman
Shimbir, lakab, shaqiiq, dhiigsumow, xummad dhammaanteeda
Dhabcaal, kabud, calool-laxaw, kul-dhibib dhidid la'aan keena
Mongoliisam qofku uu ku dhasho badi la dhaadhaamo
Shigeellada xanuun ay dhaliso leysna dhaafsiisto
Buro-qanjir cad soo dhuubma ahe dhaajinaya beerka

Maroodiyowga, dhiig-roorka, qalaw, dhiigbax-maskaxeedka
Dhurgun, oof, gurguurtiyo, luqun-jab, kolaytis shuban dhiig leh
Dhibta xundhur-ameebeedka oo jirka dhammaan gaarta
Hambalaaluq, cuncun, dhiigtag-yari dhuuqsan uu keeno
Miyelooma dhowr ahe ku badan lafaha dhuuxooda
Dhigdhikiyo qardow, hano, sardhaban dhaaxa yasirnaada
Il-wareenka dhaayaha, qataar, shulug la dhuundhuunsho
Guri ruuxa qabatoon ka dhigta, dhanna u dhaafeynin
Qarracanka ka dhasha aafadiyo dhibka culeyskiisa
Axal-dhiigga shuban dhiig leh ahe turuq dhameynaaya
Ciddidiifo dhinac fiiqan sida neef dhurwaay diirtay
Dhuuqsanka ciriirsamid-biloor cuntada dhaafeynin
Qandha-dengi, baraatifo dhammaan, tifowga dheefshiidka
Madaxfurad markuu dhiig cabburma dhumuc saluugaaya
Dhufeyl goorayaan-miiq ah iyo riiraxyada dhuunta
Menijiito dhallaankiyo ku badan dadka dhacsaaliinta
Miyirbeelka dhaawaca dartiis dhimirku uu guuro
Qalabisa mar teetana la dhaha dhowr usbuuc gaarin
Muruq-roorka isku soo dhagee dhaliya cuuryaamid
Qal-aboodi keenaya kul dhaca dhaanka dabaggaanle

Shaqiiqato dhafoor-laxaw ah ee qaadda dhinac gaar ah
Suruciya dhimir ah, shuushka iyo tawinka dheeraada
Raabbiya dhareer iyo qandho leh, boog dhammaanteed
Dhimirbeel sarco ah iyo xorraha, dhaawac xanfakiisa
Xinjir-roorka dhiiggo guntama goorna dhibib keena
Caradhabanka, dhoognaanta iyo dheelallow waraf leh
Weled, xabbad waraabow la dhaha, birdhi sidii dhaaw ah
Mallaariya dhilmaayadu sababta, duuma dhaxanleyda
Dhaaddisaarka naagaha hadduu dhib ka imaanaaya
Bushin-jeex faruuro la dhaha hal iyo dhowr gaarta
Jirka dhammi sarkoomada ku dhacda meelna dhaafeynin
Teeriyotambuur dhuunta gala keena lidka dhuuqo
Dhaameel iniintiis roqor ah gafana dheefeystay
Asqo dhama ah, bayr iyo rigaax, farad af soo dhaafay
Dhiilla xuni fin soo sida, jibaax, jirxumo dhuubnaan ah
Joqofeyda boog dhaqso u shifan hoosta ka dhaciinta
Kalaguur dhakaarrada fidaan dhakana sii raacdo
Ufaayowga dheeraada iyo kardho dhaxantu keento
Kiish-dabac halbowlaha dhexdiis dhiiggu ku uruuro
Lagu-dhasho xanuun leyska dhaxlo dhasha lasoo toosa

Qaarjeexa dhuuntiyo sambabka ku dhex ciyaaraaya
Dhambalanka jirkoo qawrar ahi, balbal dhacaan hoose
Saska dhimirka, wajac iyo wajiin, caaro dheedheera
Dhabakool sambac ah, jaynaf, cillo, lawlaw dhexyaac keena
Qaranqaaro meel dhaawacantay dhiigga dhex fadhiistay
Bocol dhargay sidiisii tulux ah, uris dhallaan eegta
Kaadiqabad ka ag dhaw kaadishiil ku ah dhif insaanka
Qarrar qeybta dhaqdhaqaaqda iyo dhasha faruurtooda
Hordiyuulam dhaayeed, wareen dheebi hooseysa
Nabar-kulka dhatuurada sababta kolkay ku dheeraata
Dhaga-jigga, dubaaqada, qarfadka harag dhib soo gaaray
Salal dheelallaaba ah, tacluus dhaarinaya ruuxa
Furuqdhonka uu dhaafay furuq dhowrka sana muuqda
Dhaayaha ilqaytaha kolkay kala dhan eegaana
Saliiliyo dhanaan keena iyo dhaaye tarakoomo
Dhawdhaw, walwal, xaliib, kaadicaso kilya dhibaateysa
Candho gooragooy lagu dhayiyo geed dhacaankiisa
Taalaasemiiyaha la dhaxlo dhiigga raacraaca
Boh, taftaafka dhallimeystay ee dhowrka sana gaaray
Kudekude qaniinyada ka dhasha ee dhex gala jiirta

Dangaraaro loo dhigo wareer shiishad ruux dhuuqay
Quuriwaa, jalleecada dhugasho dhabato soo qaaddo
Nafsi, shaki dhabiib aan laheyn dhowrsi ku abaaday
Eedaadka qofku uu la dhafro, dhoofka eyfaadka
Dhiig-urur, aflaaqiyo baxmaal, dhiillacelin doog ah
Beste iyo bah dhaacuun waraq ah, ajarro dhaayeedka
Cashi, furuqbiyood, dhiigyariyo caabuq dhoofdhoofa
Dhiigsokor, tinmood iyo basaas dhaashidarra keento
Fashfash iyo dhufasho, kaankariyo dalqamis dhuryadoon ah
Kaadigubad baxtaalkeeda dhib ah qaarna soo dhaafin
Qanjirbararka dheebida ka ag dhaw ku dhaga qaadaaya
Dhalanteed galtiga dhaalacdiyo ruux in uu dhowro
Hongod, wiiro iyo goobbo dhabar, dhaka waniinkeeda
Dufin dhiigga qulqulkiisa iyo dhinta wareeggiisa
Kuullada gaduudato dhaliso, kabrar dhaciimaaya
Labeeb uu ku dhasho ruuxa taran rag iyo dhaddigood ah
Ciir dhaadan, buulallo, tariib dhirta barkeed keenta
Mareeg dhuuqsan xundhureed ah ama dhuunta isku duubta
Dhuuqsanka anjayniyo margasho dhuunta wax istaaga
Coorcoorka dhaxalsiia jactad haragga dhaxameystay

Nabar-dhawga wax dhaayaha qabanin ruuxa ku dhufatana
Kubadhagaxa dheefshiidka iyo uuska dhidib aasto
Dhulka qandha-raggaal dadka dhigata hogada dhuurteeda
Qarjab ay dhilmaayadu gudbiso aagga dhul dillaaca
Dhaban ama dhafoor ama wajiga qayir dhibaateeya
Murgacasho jab dhuux gaarin ama dhinac u jirooda
Dhasha aaddam iyo geela iyo sanqo dhuyuur qaaddo
Saruurow, dharbaaniyo hud, toxob, maskaxgaraad, dhuunbaq
Bukhli, laxaw, carow biyo dhibsada iyo dhawaaqooda
Fin, mirguudsumow, neerfe, dhimir, cammada dhaayeedka
Cambafuufka, dhuudhiga, firguur uun dhameysnaanin
Dhuunlaabka iyo jiraggo'a dhuunjin diidaaya
Umsibyaanka dhasha saanyadee goorna dhiciseeye
Madaxfarad dhabciga kiisa kulul ruuxa dhaxalsiiya
Wadna-qabad, dhallaamiyo xubin-dhac raaska ka dhaqaaqa
Dhagoolnimo sunbay, howlgab-taran si dhif ah loo sheegto
Rifti-faali, dhuxulood, takriir, dhama dayowgeeda
Fulaynimo wax loo dhasho aheyn dhabciga uu keeno
Qandha-hurdo tixsiga dhiigga jaqa dadka u dhoofsiiya
Dhagta dhexe xanuunkeeda ee dhuunta jeer gaara

Xogta dhuunta, seyntigga, rabboow, dhaddigga dilankiisa
Qaniinyada dhul-socotiyo wixii miciyo soo dhaato
Daad, fulkaano, dhulgariir, sun iyo hub iyo dhuufaanno
Qandho cudur dhammaantiis watiyo dhimasha yoolkeed ah
Safmar reerka kii ugu dhacee cidinna dhaafeynin
Dhallaanka yar jadeecada ku dhacda, dhaayaxinjireeye
Kaduudiye dhawaan soobaxaye dhaaxa la aqoonnin
Xiiqdheerta, cukur, neef dhibidda, cudur dhammaantiisa
Dhaacuun, ebooliyo alloow dhib dhan ha noo keenin
Guriyow ilaahow naga dhig sida qof soo dhaafay
Intaas oo na dhinac martay haddaan dhimasho seegeynin
Dhabbahii jihaadkiyo allow nagu dil dhaacaadka

SHARRAXA CUDURRADA

Aafo: Dhibaato aad u weyn oo cudur, abaar ama colaad ay keentay ama bushi aanan horay loo aqoon, daawadiisana la haynin. Musiibo.

Aaho: Dhibaato aad u weyn oo cudur, abaar ama colaad ay keentay oo deegaanka dhan camimta.

Abeesow: Cudur maqaarka dadka ku dhaca oo u yeela barbaro kuwa abeesada u eg.

Abiteyt-xumo: Rabitaanka cuntada oo qofka ka maqnaata taasi oo ka dhalata cudur ama dheefshiid-xumo ama murugo iyo walwal.

Adaddaah: Madaxwareer yar oo qofku uu dareemayo kaliya.

Afburbur: Cudur nabra leh oo dadka iyo xoolahaba afka kaga dhaca.

Afdhalow: Cudur afka dadka iyo xoolaha ku dhaca oo nabarro u yeela afka iyo faruuryaha.

Afgaab: Cudur dadka ku dhaca oo oogada sida furuqa nabarro biyo leh u yeela.

Aflaaqo: Cudur timaha ku dhaca oo keena go'go'a iyo feermidda timaha.

Agool: Qolof cad oo madaxa yeesho marka uu basaaso. Toxob, rabboow.

Ajarro: Cudur indhaha ku dhaca oo uu keeno jeermis.

Anjayna: Xanuun naaska bidix hoostiisa laga dareema oo ku fida garabka, gacanta bidix iyo qoorta, waxaa sababta ciriirsamid ku timaada xididdada wadnaha dhiigga gaarsiiya, taasi oo keenta in uu yaraada xaddiga dhiigga gaaraya wadnaha. Dhuuqsan.

Arammi: Xanuun ka dhasha nabar hore oo aan si dhab ah u boksoonin oo aanan raysan.

Ardooyin: Duulal la rumaysanyahay in ay dadka ku ridaan cudur lagu daaweeyo udug, xoolo loo qalo iyo raashin, Fiqiburaale, wadaaddo.

Aroore-holac: Holac ama hur ku yimaada xididdada waaweyn ee dhiigga wareejiya ee loo yaqaanna aroorayaasha, sida badan waxaa lagu arkaa lugaha, xididka arooraha ayaa xanuunaya, wuuna kululaanayaa, waxaana dhicikarta in uu ku sameysma xinjirow.

Asaasaq: Cudur inta badan duqowyada ku dhaca oo keena illowshiyo badan.

Asqo: Harraad biyo la'aan ama fuuqbax uu dhaliyo. Dayow. Dhama.

Axal-dhiig: cudur leh shuban iyo axal dhiig leh. Dacaardhiig.

Ayaamo: Duulal la rumaysanyahay in ay dadka ku ridaan cudur lagu daaweeyo ciyaaro, xoolo loo qalo iyo udug.

Aydhis: Cudur uu sababo fayrus kaasi oo baabi'iya unugyada liinfoosaha taasi oo keenta in uu hoos u dhaca difaaca jirka una nuglaada dhammaan cudurrada, waxaa lagu tiriyaa cudurrada galmada.

Baabasiir: cudur ku dhacda malawadka qeybtiisa danbe, waxaana sababa xididdada malawadka ee dhiigga oo ballaarta dhiigna kasoo buuxsamo, waxa uuna leeyahay nabro cuncun badan leh, waxaa sababa calool fadhi muddo dheer iyo dhaawac gaara malawadka. Bawaasiir.

Baalcas: Cudur ku dhaca carruurta oo qaraw iyo caddaad leh.

Bahalow: Cudur sababa qofka in dabci ama muuqaal uu ka shabbaha bahallada dugaagta ah sida waraabaha iyo libaaxa, waxaa kale oo lagu magacaabaa cudurka eeyaha ee raabiyada loo yaqaanno.

Bajo: Cudur ka mid ah cudurrada galmada si weyna la isu qaadsiiyo, waxaana dhalisa bakteeriya, waxa uuna leeyahay barabaro ama boogo ku sameysma jirka. Waraabow, xabbad, isfillito.

Bakaal: Cudur indhaha ku dhaca oo bar cad u yeela moyda isha.

Bakooro: Cudur indhaha ku dhaca oo baqbaq u yeela ama caddeeya moyda isha.

Balbal: Meel jirka ka mid ah oo xanuuneysa. Belbel, dikaan. Takriir.

Baranooyo: Cudur dhimireed saameeya habfikirka, habdhaqanka iyo haleelidda iyo la qabsiga wadciga iyo waaqica jira, lehna isku dhexyaac iyo baxsanaan oo qofka ka dhigta in uu maqlayo cod aan jirin ama ay u sawirmayaan muuqaallo aan jirin, calaamadihiisa ugu caansan waxaa ka mid ah aaminsanaanshada in uu jiro qof korjoogteynaya ama ilaalinaya oo axwaashiisa kudaba jira rabana in uu horjoogsada hiigsigiisa, lidna ku ah doonistiisa balse asagu uu leeyahay awood aanay laheyn dadka kale, in uu yahay qof fariid ah, waxa uu ku hadlaa jumlado aan lafahmeynin iyo hadal isku daba shidan, marba waxa uu galaa mowduuc kale, waa cudur dunida ku badan, inta badan laguma dhasho laakin mararka qaar waxa uu noqdaa dhaxal, balse inta badan waxaa keena xaalado deegaaneed iyo habdhaqan sida dagaallada, abaaraha, faraxumeynta iyo garaacista iyo faquuqa waalidka ama qoyska ay kula kacaan cunugga. Galti.

Barar: Buurashada meel, qeyb ama jirka dhan oo jirro darteed la buurato.

Barariso: Cudur inta badan ku dhaca faraha oo barariya.

Bararshe: Cudur barariya wejiga ama oogada jirka oo dab lagu daaweeyo.

Baras: Cudur la iska dhaxlo oo cuncun leh, oo oogada ama maqaarka dadka ku dhaca oo caddeeya, waxaana sababa yaraansha ama waayidda maaddada midibeysada ee maqaarka, timaha iyo indhaha siisa hadba midabyadooda gaarka u ah. Caddaad.

Baruur: Hilib aan jiir aheyn oo qofka caliya uu yeesho, kaasi oo sababikara cudurra badan.

Bareellaata: Qof dareemaha uu katagay dhaawac ama xanuun dartiis.

Barraaqdo: Cudur faruuryaha/bushimaha ku dhaca oo caddeeya, Biijo, dhaleeco.

Basaas: Caddaadka ku dhaca timaha marka muddo aanan la daneynin.

Baxmaal: Cudur inta badan cagaha ku dhaca oo ay sababto bakteeriya si caalami ah loogu magacdaray soomaali, waxa uuna ka yimaadaa cagta oo ay qodax muddo kaddibna ay bakteeriyadaasi ku dhalato, waxa ayna keentaa cagta oo boogo waaweyn oo malax leh yeelato, taasii oo haddii xilli hore wax laga qabanin lugta ku faafta oo ugu danbeyn in lugta la gooyo sababto.

Bayr: Cudur maskaxeed qofka ku beera in uu ka cararo ama uu ka baqo waxwaliba. Sulufaad. Salaaf. Biinan.

Beerxaw: Cudur ku dhaca caloosha oo shuban badan leh.

Beeryaro: Cudur ku dhaca beeryaraha aadanaha. Sunbay, weled, bu'a.

Bellaagra: Cudur nafaqodarro ay sababto taasi oo ka timaada maqnaanshaha mid ka mid ah fitamiinnada uu jirku u baahanyahay, waxa uuna keenaa shuban, firiirac iyo maqaarka oo xanuuna, dhiigdhiiig jirka ah iyo qobdhacsi ama maqaarka oo diirma.

Beriberi: Cudur ka dhaaho la'aanta fiitamiin B1 oo laga helo badarka baalka ama buunshada aan laga bixinin.

Beste: Cudur halis ah oo asal ahaan ku dhaca doolliga/jiirka kaddibna booddada ayaa usoo gudbiso dadka, waxa uu waraqda iyo kilkilaha kasoo saaraa nabro waaweyn, waxaana lagu tiriyaa bahda daacuunka. Waraq.

Bidaar: Tinta oo qeybta dhakada ama basada ah ka dhamaato.

Bidhi: Bar cad oo bu'da isha ku dhagta oo diirka isha xoqda oo aad u xanuunta, reer miyigu waxa ay ku daaweynjireen in ay ku xoqaan oo ay kusoo fujiyaan diir yar oo riir loo yaqaanno.

Biijo: Cudur ku dhaca faruuryaha/bushimaha oo caddeeyo marna gaduudiyo oo dhiigga soo muujiya, Barraaqdo, dhaleeco.

Biinan: Jirro maskaxeed qofka ka dhigta qof fadaqfadaq ah oo fudud oo aan dagganayn. Sulufaad, bayr.

Biiq: Fulaynimo.

Bilhaarsiya: Daris-ku-noole bahda gorayaaka ah oo ku dhex tarma biya uu wasaqeeyay qof qaba xanuunkan oo ugxantu ay kaga hartay biayaha, inta badan waxaa laga helaa waddamada kulul. Kaadi-dhiig.

Bintijiiddo: Cudur ku bintijiiddada taasi oo ay sababta haraaga saxara ama waxyaaba kale oo afkeeda hore ku xerma.

Birdhi: Cudur, bir ama sun lagu habaaro in ay qofku disho.

Biyogal: Meel jirka kamid ah oo boog leh oo biyo ama malax gasho.

Boh: Cudur dadka iyo xoolaha ku dhaca oo qufac culus leh.

Boog: Nabar ama fin weyn oo jirka kasoo baxa oo nararka qaarna faafa mararka qaarna loo dhinto.

Boog-dhoobeey: Boog khatar ah oo si daran ugu dhacda dadka, inta badan waxa ay ku dhacdaa addimmada, waxa ay ku badneyd koonfurta soomaaliya, daawadeedana waxa ay aheyd in la jaro addinka ay ku dhacday haddii kale dhimasho ayaa xigtay, balse waayahan danbe wax xaalad ah lagama diiwaangalinin.

Boog-caloolleed: Boog ku sameysanta caloosha oo ay keenta aashatada oo gubta shukumaanka caloosha.

Boog-shiid: Boog ku sameysanta dheefshiidka, waxaana sababta aashatada caloosha, inta badan waxa ay ku dhacdaa kooxda dhiig O-da.

Boohin: Oohin ka dhalato dhibaato iyo musiibo.

Boorane: Duulal la rumaysan yahay in ay dadka ku ridaan cudur lagu daaweeyo ciyaaro, xoolo la qalo iyo udug.

Borostaata: Barar ku yimaada qanjirka borostaatada ee ku yaalla kaadihaysta gadaasheeda.

Bu'a: Cudur beeryarada barariya oo kaneecada laga qaado. Uurweynaad, caloolweynaad, sunbay, weled, beeryaro. Waxaa kale oo lagu magacaabaa cudur asal ahaan ka dhashaqa nafaqadarro oo caloosha barariyo oo afka qalaad lagu yiraahdo kawaashiyoorkoor.

Bukhli: Isuroonaanshada ama dhibsigu wax bixinta.

Buro: Barar adag oo kooban oo ku sameysma meel jirka ka mid ah, waxa ay u qeybsantaa buro-saadis-san iyo buro-saadis-xun.

Burobahal: Buro dhex galeysa oo baabi'inaysa nudayaasha, mararka qaar waxaa jirka ku faafa unugya kasocda burada, kuwaasi oo abuuro burooyin kale, taasi oo khatar galinkarta caafimaadka qofka. Buro-saadis-xun. Burobahalaad.

Burocaano: Burada kasoo horjeeddo burocaano, waa buro ku dhacda nudayaasha taasi oo unugyadeeda aysan ku faafin jirka amaba ku sameysamin meel kale oo jirka ka mid ah. Buro-saadis-xun. Burocaanood.

Buro-qanjireed: Buro qaabka qanjirka isu ekeysiiisa.

Burukiito: Xanuun neefmareenka laxiriira oo laga qaado qabow ama kuleyl jirka galay. Wareento, qaarjeex, oofwareen.

Busbus: Cudur dadka ku dhaca oo leh nabarro badan oo oogada kasoo baxa marka danbana yeesha malax ama biyo, qandho ayuu leeyahay. Furuq-biyood.

Bushi: Cudur, jirro iyo xanuun.

Bushin-jeex: Xaalad lagu dhasho oo ah dillaac mid kamid ah faruuryaha/bushumaha ku yimaada, marka qaar laba dhinac ayey u jeexmaan, marna cirridka ayaa raaca. Faruurow.

Buulallo: Finan yaryar oo oogada jirka kasoo baxa.

Buulallow: Biyo jirka gala oo nabra ka billawda.

Buuni: Mid kamid ah indhaha oo iin ama cillad leh sida in ay maqantahay ama ay dhan u janjeerto.

Caabuq: Cudurside ama jeermis. Cashi.

Caadawareer: Caadada oo xilligii lagu yaqaannay iska badbaddasho marka mudda dheer maqnaato marna xilliyo isu dhawdhaw timaado. Caada-isdhaafdhaf.

Caadaxanuun: Caadada dumarka oo marka ay soo dhaafeyso iyo xilliga ay socota la timaadda dhib iyo xanuun.

Caafimaad-darro: Xaaladda uu qofku ama nooluhu uu ku suganyahay marka xanuunsanyahay.

Caajis: Xanuun aan darneyn oo mararka qaar riixid lagu daweeyo.

Caallacaalla: Cudur ama xaalad uu qofku gabayo hannaan socodka ama dhaawac xooggan ka gaaray neerfaha oo hadal iyo dhaqaaq midnaba aan awoodin.

Caallir: Tabardarro iyo dhacsaal ka yimaado bushi.

Caanakoxato: Cudur jirka dadka siiba hareerraha indhaha ku dhaca oo nabarro cuncun leh u yeela. Caanagocato, koxato.

Caar: Cudur ku dhaca maqaarka dadka oo baro-baro cadcad u yeela. Qawid, qawad.

Caaro: Cuncun hur iyo xajiin ah oo oogada jirka laga dareemo oo sida dheedheerada barbarar leh. Xajiin. Cadanyo.

Cabeeb: Cudur lo'da iyo carruurta ku dhaca oo afka nabro kasoo dhaliya, calyo iyo dhareerna sababa in ay afka ka yimaadaan. Eeb.

Cadanyo: Cuncun iyo xajiin laga dareemo oogada jirka oo mararka qaar yeelato barbarar ama yamcuur, reer miyigu waxa ay ku daaweynjireen dhiinka geedaha. Xajiin, caaro.

Caddaad: Cudur dadka ku dhaca oo oogada jirka caddeeya taasi oo ka dhalatay yaraanshaha maaddada midibeysada ah. Baras.

Cadgo': Xanuun muruqaha ah oo hakiya dhadhaqaaqa jirka. Jiiraggo', muruqgo'.

Candho: Cudur dadka iyo geelaba ku dhaca oo oogada jirka kasoo dhaliya nabarro cuncun badan leh, nooca dadka ku dhaca waxaa keenta bakteeriya ka dhalata nadaafa darrada, reer miyigu waxa ay ku daaweeyaan marsashada dhiinka geedka gooragoyga. Isnadaamis.

Cagaarshow: Cudur dhowr nooc u kala baxa oo dadka ku dhaca, beerkana waxyeello ba'an u geysta, oo indhaha iyo kaadida cagaariya. Indhacagaarshe, qandho-cagaar.

Calool-angag: Xaalad calooleed sababta in saxaradu adkaato ama ay aad u yaraato.

Caloolfadhi: Saxarada oo adkaata ama yaraata cudur ama cunta iyo cabitaan yari darteed.

Calool-laxaw: Dhammaan xanuunnada ku dhaca caloosha oo xanuujiya. Caloolxanuun, caloolqabad.

Caloolmajiir: Xanuun daran oo qabatinkiisu daqiiqad ka yar isujiraan oo caloosha iyo midhicirrada laga dareemo, qofka mararka qaar waxa uu ku nafisaa neefsiga. Majiir.

Caloolqabad: Xanuun qabatin ah oo caloosha maroojiya. Caloolxanuun, calool-laxaw.

Caloolweynaad: Cudur kaneecada laga qaado oo beeryarada barariya; bu'a; weled. Uurweynaad. Waxaa kale oo lagu magacaabaa cudur asal ahaan ka dhashaqa nafaqadarro oo caloosha barariyo oo afka qalaad lagu yiraahdo kawaashiyoorkoor.

Caloolxanuun: Dhammaan xanuunnada ku dhaca caloosha oo xanuujiya. Calool-laxaw, caloolqabad.

Calawasaad: Xaalad walwal iyo isku buuqsanaan ah oo ay sababto dhibaato ama jirro maskaxeed. Calwasaad.

Cambaar: Cudur ku dhaca maqaarka lehna goobo yarar oo marka danbe faafa, waxa uu leeyahay cuncun aan badneyn, cambaartu meesha ay ku taallo waxa ay u muuqataa in ay ka hooseyso oogada kale ee jirka, reer miyigu waxa ay ku daaweynjireen ku gubidda digada geela oo kulul amaba nool.

Cambaarcad: Cudur aan laheyn dhibaato weyn, oo maqaarka dadka ku dhaca oo goobo cadcad u yeela. Qawid, qawad, caar.

Camma: Indha la'aan, indhabeel.

Canbafuuf: Cudur ku dhaca qanjirada oo barariya, mararka qaar waxaa sababa afuudidda culus. Qaamowqashiir.

Candhabeel: Cudur ku dhaca candhada dadka iyo xoolaha oo xididdada caanaha waaxyeelleeya.

Caradhaban: Xanuun damqasho yar leh oo laga dareemo oogada jirka.

Carow: Cudur uu keeno fayrus, waxa uuna ku dhacaa maskaxda iyo xangullada ee xoolaha dhiigga kulul, waxaana sida badan dadka u gudbiya qaniinyada ey cudurka qaba, waxa uuna leeyahay qandho, nacbeysiga biyaha iyo shanqartooda, culeys neefsiga ah, dhareer iyo curyaannimo ugudanbeyntii, waxaa jira xaalado aanan la isku waafaqsaneyn balse si dhif ah loo diiwaangaliyay oo ah in uu bukaanku yeesho dhawaqa eyga. Raabbiyo, biyonaceyb.

Carsaanyo: Cudur halis ah oo si dhaqsana ugu fida oo sida carsaanyada dhinacwaliba u dhaqaaqa oo ay dawadiisu tahay in la gooyo ama la jaro inta uu haleelay ama uu gaaray. Kansar, fayiix, feex, bahalaad, buro.

Casir: Xanuun qabatin daran ah oo caloosha laga dareemo.

Cashi: Cudurside ama jeermis. Caabuq.

Ciddidiifo: Cudur ama diir ka fiiqma dhinacna uga dhaggan halka ay iska gaalan jirka iyo ciddida.

Ciir: Finiinac yaryar oo oogada noolaha kasoo baxa.

Cillin: Qof curri ama coon ah ama dhererka da'diisa aad uga gaaban, amaba qaarka danbe naafa ka ah.

Cillo: Dhaliil ama iin mararka qaar ka timaado cudur.

Ciriirsamid-bilooro: Muruq bararka xagga caloosha ah oo ciriiriyiisa waddada ay cunnadu marto marka ay u gudbeyso midhicirka, arrintaasi waxay ay sababtaa in ay cuntadu ku raagto caloosha, mararka qaar waxaa dhacda in la matago cunto maalin kahor la cunay.

Cirweyni: Cunidda raashiin badan. Dhuuni.

Coonnimo: Korriinada oo habsaanta cudur ama nafaqa darro darteed.

Coorcoor: Jilifeysi, kafiif ama cadarsanaan ka muuqata jirka oo uu keeno qabow ama jirro.

Cudur: Caafimaad-darro ku dhacda jirka noolaha.

Cudurside: Noole martigaliya kana qaybqaata koritaanka jeermiska cudurrada qaarkood keena.

Cukur: Cudur ama xanuun ku dhaca habdhiska guud ee ay ku jiraan mirguudka iyo codeeyayaasha, waxaana sababa fayrus ama jeermis ku beerka aaggaas, waxayna keentaa xanuun, xabeeb, qufac qallalan, culeys neefsiga ah iyo mararka qaar codka oo xerma. Codeeye xanuun, cune xanuun.

Cunabarar: Jirro ku dhacda dhuunta oo bararisa.

Cuncun: Xaalad cudur oo ka timaadda falgal uu jirku kaga hortagayo ama iskaga caabbinayo walxo ama dhibaato dibadda uga timid, walxahaasi waxaa ka mid noqonkaro waxyaabo uu jirku u baahanyahay.

Cunta-sumow: Xaalad cudur oo saameysa qaybta dheefshiidka ama guud ahaan jirka, waxaana keena cunitaanka cunno xumaatay oo wadata bakteeriya ama sun baktiiriya, ama sunta lagu buufiyay miraha ama khudaarta si loogaga dilo xasharaadka, ama maaddooyin bacrimin ah.

Cuqdad: Cudur nafsi ah oo qofka ku beera shaki iyo kalsooniddarro uu ka qabo naftiisa iyo dadka kaleba.

Curuq: Xanuun yar ama kabaabiyo oo laga dareemo murqaha iyo seedaha marka fadhi lagu raago.

Daaco: Neef ka timaada caloosho oo wadato riixada raashinkii ama cabitaankii u danbeeyay ee la cunay ama la cabay, mararka qaar riixadeedu way xuntahay waxaana sababa caloosha iyo dheefshiidka oo ku daala kala shaandheynta iyo ka shaqeynta cuntadaasi, kaddibna shaqada ka nasto, inta badan waxa ay timaadaa marka la cuno raashiin kala jaadjaad ah oo badan, nowcan danbe waxaa loo yaqaannaa daacashiir.

Daad: Biyo xoogga oo roob, wubi ama waadi ka yimaada oo dalagga, dadka iyo deegaanka waxyeelleeya.

Daaf: Xanuun safmar ah oo indhaha ku dhaca oo ay gaduutaan oo cuncun iyo hur yar leh.

Daal: Jiiraggo' ama noog jireed ama maskaxeed oo ka yimaada hawl ama fikirid adag waqti dheer lagu jiray.

Dabadhiig: Calool xanuun daran oo qabatin leh, lehna shuban yar oo dhiig iyo axal isugu jira.

Dabar: Midab gaduud ama boor ah oo ilkaha dadka yeeshaan, inta badan waxaa sababa biyaha ceelasha qaar ama dhanada ah oo sanado badan qofku uu cabayay, dabarku waxa uu digirka kaga baddalanyahay waxa uu inta badan si gaar ah u saameeyaa kaliya foolasha.

Dabaxaw: Cudur caloolsha ku dhaca oo shuban xad dhaaf ah leh.

Dabdhul: Cudur maqaarka ku dhaca siiba lugaha oo leh boogo biyo ku jiraan.

Dabeyl: Cudur dadka ku dhaca oo la is qaadsiiyo, oo uu sababo fayrus, waxa uuna ku dhacaa maskaxda iyo xangullada, kaasi oo keenikara naafo dhinac waliba ah, waxa uu ku badanyahay goobaha nadaafaddarrada iyo macluusha ay ka jirto. Booliya.

Dacaardhiig: xanuun ku dhaca caloosha oo shuban iyo saxarada oo dhiig soo raaco leh. Axaldhiig.

Dacar: Xanuun lallabo iyo afka oo qaraar noqda leh oo dheefshiidka ku dhaca. Qaras, dacaar.

Dalqamiso: Sixir lagu sameeyo qof la doonayo in uu sheego wax uu ogyahay balse uu qarinayo.

Dalqo: Cudur ku dhaca dalqada oo qeybta hore bushiya oo dadka reer miyiga ay jarijireen qeybta hore ee bukatay. Dalqo-holac.

Dameerow: Cudur ku dhaca carrabka oo dhareer badan keena.

Damiinnimo: Fahamka iyo xifdibta oo adkaato. Fahan-dhagxaanow.

Dangaraaro: Madax-wareer.

Dayow: Harraad biyo la'aan ama fuuqbax uu dhaliyo. Asqo, dhama.

Dementiya: Xaalad cudur oo joogto ah ama muddo dheer socota oo ay maskaxda gabto hawsheeda, ofka cudurkan qabo waxaa lasoo darsa xasuus xumo, isku dhex yaac, fikir xumo, habow iyo is-daneyn la'aan, waana cudur dhaliya asaasaqa iyo kaliyowga.

Dhaabballo: Haaraha ka hara dhaawac ama gubasho soo gaartay jirka goor hore.

Dhaacuun: Cudur muddo gaaban oo saddex nooc u kala baxa, oo safmar ah, inta badan waxaana laga qaadaa booddo qabto bakteeriyada cudurka, kiisa ugu daran waxaa loo yaqaannaa daacuun-caloole, dhaqso ayuu u faafaa, waxa uuna leeyahay shuban badan oo biyo ah waxa uuna dhiliyaa fuuqbax dagdag ah. Daacuun.

Dhaaddisaar: Dhaddigood marka uu dhalay horay ka rimay (uur qaadday).

Dhaafis: Cudur si hoose oo ulakac ah qof kale loogu gudbiyo ama lagu raro.

Dhaandhaan: Xaalad maskaxeed oo uu qofku caqli ahaan dhimmanaado.

Dhaaw: Habaar. Inkaar.

Dhaawac: Nabar, jug ama durriin xanuun leh oo jirka soo gaara.

Dhaaya-la'aan: Qof aan indhaha wax ka arkin. Indhalaawe.

Dhaayamidibeeeye: Cudur dadka ku dhaca oo indhaha caseeye ama guduudiya, waxaana keena fayrus ay gudbiso nooc khaas ah oo kamid ah kaneecada, waxa uuna burburiyaa nudayaasha beerka iyo kilyaha, waxa uu leeyahay maqaarka iyo indhaha oo casaada/gaduuta ama boorooba, qandho, madax xanuun, wareer, caloolfadhi, murqa xanuun, lallabbo iyo matag. Indhacaseeye.

Dhaayaxinjireeye: Dhaayamidibeeeye, indhacaseeye.

Dhacdhac: Cudur qofka ku dhaca oo uu la dhacdhacayo.

Dhabakool: Qof caqli gaaban oo dhoohan. Sawir. Sambac.

Dhabannahays: fikir iyo walaac dartiis dhabannada sacabbada la saaro.

Dhabarjabshe: Cudur ku dhaca laf-dhabarleyda oo dhabarka xanuujiya.

Dhabarxanuun: Xanuun dhabarka ku dhaca.

Dhabar-xoodnaan: Dhabarka oo sida qaansada oo kale noqda, Tuur.

Dhabateysi: Quuriwaaga dhaliyo in qofka wax haysta uu la xanuunsado.
Qumayeysi, ileysi, cuyuun, cayuun, jeedaal, maliilac, jalleeca.

Dhabcaal: Qof aanan ku fiicneyn wax bixinta. Bakhiil; Muudal.

Dhabqalallo: Qof caliga ahaan dhimman. Dhaandhaan. Sacsac. Sawir.

Dhacsaal: Diifta iyo itaaldarrada ka muuqata dad ama xoolo ay baahi, cudur, iwm hayaan. Heec.

Dhadhab: Riyo muuqaallo ah oo la arko hurdada dhexdeeda oo uu mararka qaar ku laranyahay hadal uu qofku si hadaaq ah u hadlayo.

Dhadhamin-la'aan: Cunta oo qofka u dhadhamin cudur ama xaalado kale darteed.

Dhafoor-laxaw: Madax xanuun yar. Goonjab.

Dhaga-jig: Maqalka dhagaha oo cuslaada.

Dhagaxa killida: Walxo adag oo ku sameysma marinnada killida, waxaana sababa miisaanka badan iyo nidaamdarrada ka jirta saamiga cusbada iyo macaadinta ku jirta dareeraha, nowca ugu badanna waa tan ka dhalata walxaha kaalsiyomka.

Dhagax-xameetee: Dhagax ku sameysma xameetida.

Dhagool: Qof dhaga la' oo aanan wax maqlin.

Dhajis: Cudur caloosha ku dhaca oo matag badan leh oo la aaminsanyahay inuu ka dhasho qofka oo cunta ama cabitaan lagu ileysto.

Dhakabiye: Teetana, kojiye, todobamagaarto, qalabiso, kalaamidiyo.

Dhakaako: Cudurka kaliyowga ee qofka ka dhiga in uu jeclaado kali joogga iyo aamusnaanta. Awtiisam.

Dhakafaar: Yaab aad u weyn oo ay dhibaato sababtay.

Dhakan: Maqalka qofka oo liito.

Dhalaad: caddaad kusameysma isha birteeda kaasi oo keena aragga oo xumaada.

Dhalalyo: Xanuun ama xanfayyo laga dareemo ilkaha marka ay la kulmaan ama lagu cuno wax qabow, macaan iwm.

Dhaleeco: Cudur bushimaha/faruuryaha ku dhaca oo caddeeya. Biijo, barraaqdo.

Dhallaamo: Cudur maskaxeed qofka ka dhiga qof aan daganeyn, caadhifad badan, go'aan laheyn, duufsasho iyo dhalanrogid u dabacsan, baqdin badan leh, waxa uu ka yimaadaa xaalado deegaan iyo dhaxaltooyo, waxaase sababa daciifidda ama jilcanaanshaha qofka maskaxda, dabeecadihiisa waxaa ugu caansan qofka in uu yahay qof markasta jecel in uu dadka ka qosliya ama maadeys sameeyo, iyo in uu u labista qaab ama uu ku labisto dhar maad leh, marka ay xaaladdu darantahay waxuu sababikaraa indhaha oo gaduuto, jiiraggo', wadne garaac badan, wadne xanuun, madaxfurad iyo dhinac dhac. Histeeriya.

Dhalow: qof aad u da' weyn oo carruuroobay. Ilmow.

Dhal-qallooc: Ilmaha oo qalloocda xilliga dhalmada oo is roga.

Dhalma-la'aan: Nimcada dhalmada oo qofka uusan haysanin, oo uu ilmo dhaleynin. Madhaleysnimo.

Dhama: Diif iyo dayow ka dhasha gaayo iyo harraad. Dayow, asqo.

Dhanjaf: Xanuun laga dareema qeyb madaxa ka mid ah gaar ahaan dhakuumanka ama dhafoorrada. Goonjab.

Dhanqalan: Oon iyo harraad aad u daran oo ka yimaada biyo weyto ama fuuqbax.

Dhar: Jirka oo ay nafaqada iyo tabarta ka dhamaato fuuqbax, oon ama gaajo darteed.

Dharabow: Cudur dadka kaga dhaca oo u yeela barar iyo dildillaac oo ka dhasha dhiriqda iyo dhoobada.

Dharasow: jirka oo jilca da' awgeed.

Dharbaano: Nabro ama godad yaryar oo uu wajigu yeesho.

Dhase: Nooc dixriga ama galluunka ka mid ah oo ka dhasha meelaha ay wasakhdu ku badantahay oo xoolaha iyo dadkaba jirkooda gala, mararka qaar waxaa la sheegaa in kuu ka dhasho qaniinyada cayayaanka. Kudekude.

Dhawaq-la'aan: Codka oo qofka ku xermo, cudur muuqda ama mid qarsoon dartiis.

Dhawdhaw: Aragga oo aan dhaafeynin in uu wax ka arko 6 mitir wixii ka fog.

Dhaysantariya: Xanuun caloosha ku dhaca oo leh saxara takar ama axal ah.

Dheebi: Nabar ama dhaawac qoyan oo jirka soo gaaray.

Dheedheero: Nabra jirka kasoo baxa oo yara buurbuuran oo xilli kooban jira oo mararka qaar ay xajiintu keenta.

Dheefsade: Noole ku dhex nool noolaha kale oo mararka qaar jirka waxyeelleeya. Dariskunoole, dhufeyl.

Dheefshiid-xumo: Dheefshiidka oo ku fashilmo in uu cuntada maareeyo, waxa uuna keenaa dibiryo, lallabbo iyo matag.

Dhibib: Xaalad sida suuxdan ama dhinac dhac oo kale ah oo si kadis ah qofka ugu dhacda sida badanna saameysa dhinac dhan oo jirka ka mid ah, waxaana keena dhiigga oo ka kala go'a qeyb ka mid ah maskaxda. Faalij, faali, xubnaqallal, dhinacdhac.

Dhibiib: Suuxdinta guud ahaaneed ama gaar ahaaneed ee ku timaada qof dhdhiig badan ka baxay ama uu ka kala xermay.

Dhicisin: Dumarka oo ilmaha soo tuura inta aysan bila dhameysan.

Dhigdhika: qufac tiro badan oo is-daba joog ah. Riiraxyo.

Dhiigbax: Dhiig kabaxa jirka taasi oo uu sababay dhaawac ama cudur.

Dhiigbax-maskaxeed: Dhiig ka yimaada halbowlaha oo maskaxda ku furma, inta badanna waxaa sababa cudur ku dhaca xididdada dhiigga iyo dhiigkar.

Dhiig-caddaad: Dhiigga qofka ku jira oo inta uu jirku u baahanyahay ka yar.

Dhiig-dhac: Caadaadiska dhiigga halbowlayaasha oo hoos u dhac weyn sameeya inta badan waxa ay timaadaa marka uu yimaado fuuqbax ama dhiigbax.

Dhiig-goror: Dhiig sanku ka yimaada badanaa waxa uu yimaadaa marka uu madax xanuu jiro. San-goror.

Dhiigkar: Cadaadiska dhiigga oo kor uga kaca cabirka caadiga ah ee lagu yaqaanno dhiigga daggan ee caadiga ah.

Dhiig-la'aan: Cudur ka dhasho nafaqa darro ama xanuunno qofka ku dhaca dartood. Aniimiya, dhiig-yaro.

Dhiigmadoobaad: Dhiig madow oo maqaarka hoostiisa ku uruura marka ay jug gaarto meel ka mid ah jirka ama ay go'aan xididdo.

Dhiig-roor: dhiig ku guntama meel nabar ku dhacay.

Dhiig-sokor: Kaadisonkorow. Kaadimacaan. Cudurka sonkorta.

Dhiigsumow: Dhiigga oo xumaada taasi oo uu inta badan sababo cudur side baabi'iya nudayaasha.

Dhiigtag-yari: Qulqulka ama tagista dhiigga oo ka yaraata qeyba ka mid ah jirka taasi oo ay keenta xididdada dhiigga qaada oo ciriirsama ama xerma, inta badan sababtaa anjaynaha ama dhuuqsanka.

Dhiig-urur: Dhiig ku ururay nudayaasha dhexdooda oo xinjirooba kaddibna waxaa sameysanta meel adag oo soo buuran.

Dhiigyaac: Dhibaato xagga xinjirowga ah taasi oo u gaar ah labka, kaasi oo awoodda xinjirowga dhiigga ay ka maqantahay. Hiimofiiliya.

Dhiigyaro: Cudur ka dhasho nafaqa darro ama xanuunno qofka ku dhaca dartood. Aniimiya, dhiig-la'aan.

Dhiillatiran-la'aan: Unugyada jirka ama walxa kale oo haga habsami u socdoka howlaha jirka oo kala dhiman.

Dhimashada unugyada jirka: Dhimashada qaar ka mid ah unugyada ama khalaayaadka uu jirku ka koobanyahay ee il-ma-aragtada ah.

Dhimmanaansho: Xaalad koritaanka maskaxda uusan gaarin halkii loogu talagalay, waxa ay keentaa caqliga ama garaadka oo yaraada.

Dhimir: Cudur maskaxeed dunida caan ka ah waxaana ugu hooseeyo isla-hadalka waxaana ugu sarreeyo waallida.

Dhimirbeel: Waalli ama qafiifid.

Dhinacdhac: Cudur ku dhaca qeyb ka mid ah jirka oo dareemaha iyo awoodaha ka dila, waxaana keena dhiigga oo maskaxda ka xirma ama meel kale ku furma taasi oo kenta xaalad kada ah oo uu qofka la miirdaboolmo. Faali, faalij, dhibib, xubnaqallal.

Dhirif: Xanaaq iyo caro dabeeci ah.

Dhoohanaan: Feejignaan la'aanta iyo in aanan laga war haynin waxa saaxada ka dhacaya.

Dhows: Nin xoog weyn oo nacas ah.

Dhoylaaw: Caqligaab.

Dhoys: Qof caaq ah oo aan tirsiimo laheyn waxbana ku toorneyn.

Dhufasho: Cudur, xanuun ama dhinacdhac laga qaado jinni oo qofka dardara/jiira ama feera ama uleeya/garaaca ama afuufa. Nabardhaw.

Dhufeyl: Noole ku dhex nool noolaha kale ee mararka qaar jirka dhib u geysta. Daris-ku-noole.

Dhugma-la'aan: Dhibaata xagga dareemaha ah oo qofku uusan awoodin in uu wax korjoogteeyo oo uu ilaalo ka hayo, ama in uusan si fudud u dareemeynin waxyaabaha hareerrahiisa ka dhacayo ee shanqarta ama jabaqda gaaban, haddallada maldahan ama baaqyada ama farmuqa siraha lagu gudbiyo.

Dhuldhac: Jirro culus oo qof la kici waayo.

Dhulgariir: Dhaqdhaqaa ka dhaca lakabka kore ee dhulka kaasi oo dhibaateeya dadka iyo deegaanka.

Dhullax: Nabar inta badan barida kasoo baxa oo biyo yeesha.

Dhuran: Hadal tiro badan oo aan xikmad lahayn oo tambarta iyo maskaxda saameeya.

Dhurgun: Jirka meel kamid ah oo buusanta ama diisanta.

Dhurwaayow: Cudur ka mid ah cudurrada galmada oo si weyna la isu qaadsiiyo, waxaana keenta bakteeriya, waxa uuna leeyahay barabaro ama boogo ku sameysma jirka iyo jeexjeex cagaha ah oo aan badneyn. Isfiillito, xabbad, bajo, waraabow.

Dhutin: Jiis ahaansho, laangare ahaansho.

Dhuudhi: Dixri ama galluun dadka cagaha ka gala oo ka dhasha meelaha mudda dheer la dagganaa. Waxaa kale oo loo yaqaannaa xanuun jirka saaqa marka meel jirka ka mid ah ay dhibaato soo gaarto sida in uu nabar kasoo baxo ama ay gubato.

Dhuufaan: Roob dabeylo wato oo dhibaateeya dadka, dalagga iyo deegaanka.

Dhuunbaq: Dillaac ama duleel ku yimaada cunaha ama hunguricaddaha iyo cakaarka, waxaana keena qufaca iyo hindhisada culus ama in la cabburiyo.

Dhuunlaab: Xaalad ka dhacda qeybta hoose ee hunguriga ee kala xerta caloosha iyo hunguriga, waxaa si aan dabiici aheyn u furma qeybtaasi kaddibna waxaa hunguriga soo gala cuntadii ama aashatadii caloosha taasi oo keenta xanuun qeybta sare ee caloosha, qoorta iyo dhabarka, matag ama hunqaaca, taasi oo haddii ay muddo qaadata keenikarto waxyeello soo gaarta nudayaasha qeybtaasi, waxa uu si dhif ah u sababaa kansarka cunaha qeybtiisa hoose.

Dhuuni: Rabitaanka saa'idka ah ee cuntada ama cunidda cunta badan. Cirweyni.

Dhuuntow: Cudur qanjirrada dalqada ku dhaca. Majin, quun.

Dhuyuqsan: Xanuun ku dhaca xididdada wadnaha gala oo yaraada ama dhuyuqsama taasi oo ay ka dhlato in uu yaraado dhiigga wadnaha gaarayo waxaana ka dhasha xanuun sida qabatin oo kale ah oo waaxyaha bidix oo dhan ku faafa. Anjayna.

Dhuuri: Dixiri ama galluun yar oo waqtiyada dharabka/dhadada ama dhiriqda dhexdeeda qofka kaba la'aanta socda cagaha ka gala oo xanuun dhaliya, waxaa kale oo af-mayga loogu yaqaannaa xanuun.

Dhuxulood: Cudur ku dhaca dadka iyo duunyada, sida la aaminsanyahay dadku waxa ay ka qaadaan xoolaha, waxaana keena jeermis, waxa uuna raacaa neefta ama maqaarka ayuu qofka ka galaa, halka uu maqaarka ka galo waa ay hambalaaluqdaa kaddibna waa ay madoobaataa, marka uu neefta raacana waxa uu yeeshaa calaamadaha qaarjeexa oo kale.

Digir: Midab gaduud ama boor ah oo ilkaha dadka yeeshaan, inta badan waxaa sababa biyaha ceelasha qaar ama dhanada ah oo sanado badan qofku uu cabayay, digirku waxa uu dabarka kaga baddalanyahay in uu wada saameeyo foolasha iyo dhoolasha.

Dilan: Uurka cusub ee xinjiraha ah oo si dareere ahaan ah haweeneyda uga soo daata, taasi oo ka dhalata cudur ama jug darteed.

Dire: Nooc gorayaanka ka mid ah oo yaryar oo mindhicirta dadka siiba carruurta ku dhasha.

Doog: Soo laba kacleynta nabar ama boog horay u reysatay.

Dubaaqo: Nabar weyn oo jirka gaaray.

Dufin: Baruur dagta xididdada dhiigga oo yareysa qirada xididdada taasi oo habsaamisa ama curyaamisa qulqulka dhiigga. Korostarool.

Duray: Cudur ka mid ah cudurrada neefa mareenka oo uu keeno fayrus, waxa uu leeyahay hur sanko iyo cunah ah, waxaa ka mid ah kuwa laga qaado shibiraha iyo doofaarka. hargab, hergab.

Duufduuf: Cudur qofka ka lumiya hannaansocodka oo shuban leh oo la iska dhaxlo, qofka qaba cudurkaasi ilmihisa 80% way qaadayaan. Duuduuf, muqlo.

Duumo: Cudur qandho qabow iyo kulayl isugu jirta leh oo dadku ka qaadaan kaneecada nooceeda dheddig. Mallaariya.

Eboola: Cudur khatar ah oo dhimashadiisu ay gaarto 90% waxaana sabab fayrus la aaminsanyahay martigaliyahiisa ugu weyn in ay tahay kibillayda/fiidmaarta -gaar ahaan nowca laga helo beeraha qudaarta iyo faakihada- waxa ayna u gudbisaa noolaha intiisa kale, waxa uuna ku gudbaa taabashada jirka, dhiigga, dheecaanka ama candhuufta bukaanka, waxa uuna leeyahay qandho, murqa xanuun, madax xanuun, tabardarro, finiinac, matag iyo shuban, waxaa isku dhexyaacayo shaqadii beerka iyo kilyaha, waxaana meesha ka baxayo xinjirowga taasi oo keeneysa dhiigbax gudaha iyo dibadda ah iyo meelwalba oo furan.

Eeb: Cudur carruurta kaga dhaca afka oo nabarro kasoo bixiyo. Cabeeb.

Eedaad: Xanuun daran.

Eel: Dhibaato aad u weyn sida cudur.

Eerna: Mindhicirka oo soo riixa xuubka sare ee caloosha kaddibna baqin yar kasameysta, inta badan waxaa sababa qofka oo wax culus qaada. Hud.

Emfiseema: Xaalad dhibaato dhanka neefsiga ah taasi oo ka timaada sambabada oo lumiya isbuufinta iyo isbiifinta O₂ iyo CO₂.

Eyddin: Xanuun daran oo saableyda xanuujiya. Oof.

Eyfaad: dhibaato weyn oo qofka hargal iyo hoyaad u diidda, oo uu qofku la dagaago ama dallaabo.

Faaliij: Cudur ku dhaca dhinaca bidix ama midig oo jirka ka mid ah sida garab, gacan, qaar iyo lug is xiga, kaasi oo dareemaha iyo awoodaha ka dila, dhiigga oo maskaxda ka xerma ama ku furma taasi oo kenta xaalad kada ah oo uu qofku la miirdaboolmo. Faali, dhibib, xubnaqallal, dhinacdhaac.

Fadaq: Dabeecadda xasilloonidarrada iyo fudfudeydka. Fadaqfadaq.

Fadfad: Haaraha uu ku reebo furuqa maqaarka qofka uu horay ugu dhacay. Furuqdhoon, furuqdhaw.

Fadhiid: ilmo cudur ama nafaqadarro darteed waqtigii uu socon lahaa aan socon.

Fahmadarro: Xanuun aan weynayn.

Faje: Cudur lafdhabarta/durdurta ku dhaca oo keena gasarka ama tuurta. Fajo, fuje, gasar.

Fangaay: Nooc kamid ah noolaha yaryar oo cudurra sababa.

Fanto: Cudur ku dhaca jirka oo nabarro dhacaan iyo malax leh ka soo bixiya ee googooya.

Farad: Sixir ama habaar.

Faraggal: Cudur faraha ku dhaca oo leh boogo xanuun badan.

Faraqarrar: Cudur faraha ku dhaca oo dhaliya boogo xanuun badan leh.

Faruur: Xaalad lagu dhasho oo ah dillaac mid kamid ah faruurraha ku yimaada, marka qaar laba dhinac ayey u jeexmaan, marna cirridka ayaa raaca. Bushin-jeex.

Fashfash: Boog ama meel jirka ka mid ah oo aad u bukoota oo isdeydeysa.

Feex: Cudur halis ah oo si dhaqso ah ugu fida oo sida carsaanyada dhinacwaliba u dhaqaaqa oo ay dawadiisu tahay in la gooyo ama la jaro inta uu haleelay ama uu gaaray, qaarkiis waxa uu ka dhashaa buro carjaw ah oo ka dhalatay jug soo gaartay jirka. Carsaanyo, fayiix, bahalaad, buro, kansar.

Fiistula: Duleel/dalool ama jeex aan dabiici aheyn oo sameysma kaasi oo xiriiriya laba marin ama xubnood oo kala xernaanjiray, mararka qaar waxaa dhacda in uusan u gudbin meel kale oo marin ah balse uu meel dhexe ku dhamaado, kaddibna wixii marinka soo galo ay ku uruuraan oo ay ku cabburmaan godkaasi kaddibna waxaa sameysma wax sida nabar ama buro ahaan ah, cudurkan waxaa ugu caansan nowca ku dhaca dumarka ee isku fura xubnaha taranka iyo saxarada. Iskufuran.

Fikir: Dhibaato soo gaartay darteed fikirka maqnaashaha ah ee qoka ku dhasho kaasi oo waxyeelleynkara caafimaadkiisa.

Fin: Nabar kasoo baxa oogada jirka oo qaarkii uu dhib leeyahay.

Findoob: Finan yaryar oo aan cudur ahayn oo dadka dhalinyarta ah wejigooda ka soo baxa.

Finiinac: Nabra ama fasas yaryar oo jirka kasoo baxa siiba xilliga kaliisha/hogada ah ee ay jirto dabeysha qoyaanka leh ee geedaha nagaarisa/fiixisa. Firiiric. Furuuruc. Roobsugow.

Fiqiburaale: Duulal la rumaysanyahay in ay dadka ku ridaan cudur lagu daaweeyo udug, xoolo loo qalo iyo raashin, Ardooyin, wadaaddo.

Firguur: Xaalad dhimmanaasho ka dhalata isbaddal ku yimaada koromsoomka 21 oo ah 2 koromsoom oo noqonata 3 koromsoom, taasi waxa ay keentaa in qofku uu jir ahaan iyo garaad ahaanba dhimmanaado ama qeybka ka mid ah jirka oo qaabkii

la yaqaannay si aan aheyn u sameysma sida indhaha oo qaab kale u jeexma sida dadka mongooliya. Mongoliisam

Fool: Dareen xanuun leh oo dheddigga qabta marka ay umulayaan.

Fooldiin: Xanuun fooleed qabta dheddigga dhalaya marka ay soo sid dhaweeyaan.

Fulaynimo: Biiq.

Fulkaano: Qarax ka dhasha dareere dhulka ku jira oo aad u kululaada kaddibna cabburma kaddibna qarxa, kaasi oo dadka iyo deegaana waxyeello u geysta.

Furuq: Cudur la isqaadsiiyo oo muddo gaaban oo uu keeno fayrus, waxa uuna leeyahay qandho iyo finan haddii uu qofku ka bogsado haaro ku reeba maqaarka.

Furuqbiyood: Nooc furuqa ka mid ah kana dhibyar furuqa caadiga ah oo nabrahiisu biyo galaan malaxda baddalkeeda. Busbus.

Furuqdhoon: Nabra ama haaro yaryar oo uu furuqu reebo. Fadfad.

Fuuqbax: Biyaha oo ka baxa jirka taasi oo ka timaado dhidib badan, matag iyo shuban.

Gaade: Cudur sambabada xanuujiya.

Gaajo: Dareenka baahida ah ee la dareemo marka muddo aanan cunto la cunin, waxaa kale oo si guud loogu magacaabaa abaaraha. Macluul.

Gaas: Cudur ku dhaca caloosha iyo dhiig mareennada oo qandho iyo lallabbo leh, waxa uuna keenaa nabar caloosha ama dheefshiidka ku sameysmo.

Gaastarig: Nabar caloosha ku sameysma oo ay sababta aashatada oo ku uruurta caloosha.

Gaatir: Maqaarka oogada dadka oo adkaada gaar ahaan kan sacabbaha iyo cagta.

Galawkooma: Cudur kordhiya cadaadiska isha dhexdeeda ah, mararka qaarna waxa uu keenaa indhabeel.

Gadaf: Labada lugood oo qabow ama jirro sida kaalshibeelka dartiis la qalloocda oo sida qaansada u xoodsama.

Gaduudato: Cudur maqaarka ku dhaca oo ay sababto bakteeriyada kuullada, waxa uuna keenaa barar, gaduudasho maqaarka ah, barabaro, goobo waaweyn ama xarriiqtimo gaduudan oo badanaa daamanka iyo sanko kasoo muuqdo, madax xanuun, lallabbo iyo nabro jilicsan oo malax ku jirto oo maqaarka kasoo baxa marka ay xaaladdu darantahay.

Gale: Cudur ku dhaca xubnaha taranka ee dadka, waxa uuna keenaa dhabar xanuun iyo dhalmo la'aan. Jabto.

Galti: Cudur dhimireed saameeya habfikirka, habdhaqanka iyo haleelidda iyo la qabsiga wadciga iyo waaqica jira, lehna isku dhexyaac iyo baxsanaan oo qofka ka dhigta in uu maqlayo cod aan jirin ama ay u sawirmayaan muuqaallo aan jirin, calaamadihiisa ugu caansan waxaa ka mid ah aaminsanaanshada in uu jiro qof korjoogteynaya ama ilaalinaya oo axwaashiisa kudaba jira rabana in uu horjoogsada hiigsigiisa, lidna ku ah doonistiisa balse asagu uu leeyahay awood aanay laheyn dadka kale, in uu yahay qof fariid ah, waxa uu ku hadlaa jumlado aan lafahmeynin iyo hadal isku daba shidan, marba waxa uu galaa mowduuc kale, waa cudur dunida ku badan, inta badan laguma dhasho laakin mararka qaar waxa uu noqdaa dhaxal, balse inta badan waxaa keena xaalado deegaaneed iyo habdhaqan sida dagaallada, abaaraha, faraxumeynta iyo garaacista iyo faquuqa waalidka ama qoyska ay kula kacaan cunugga. Baranooyo.

Gariir: Dhaxan, jirro ama duqow dartiis oo uu jirku la ruxmo siiba gacmaha iyo afka. Qarqaryo, dardhasho. Lawlaw.

Gasar: Cudur ku dhaca lafdhabarta oo dadka tuur u yeela. Faje.

Geestaan: Xanuun ka yimaada dhabarka oo ku fida bowdada lugta, shanshada ilaa cagta, waxaana keena carjawda ku dhexjirta labada laf-dhabar kaddib waxa ay saameysaa nudaha dareenwadayaasha mara dhabarka.

Geestahanyo: Cudur ku dhaca sinta dadka oo kala gaabiya labada lugood.

Gibilmadoobaad: Diifta iyo gubnaashada ka muuqato jirka taasi oo ka dhalatay dhibaato, jirro, gaajo, murugo ama abiteytxumo iyo dheefshiidxumo.

Goggob: Xanuun ama cudur qofka u diida xakameynta xubnaha, mararka qaar waxaa keena nabar qoorta kasoo baxa. Gaggab.

Goobbo: Tuurta dhabarka qeybtiisa sare ah ee aad aan u xoodsaneyn. Hongod.

Goonjab: Xanuun dhafoorka ah oo ka mid ah bahda madax xanuunka. Dhanjaf.

Goorayaan-miiq: Deris ku noole ka mid ah bahda goorayaannada oo ku nool qeybta sare ee midhicir weynaha waxa uuna keenaa cudur carruurta ku dhaca.

Gowracato: Cudur ku dhaca cunaha iyo neefmareenka oo leh cuna xanuun, qanjirbarar iyo dhibaato neefsiga ah. Gawracato.

Gunaad: Nabar kor ka bogsooday balse hoos ka buko.

Gurguurto: Cudur ilmagaleenka kaga dhaca ummulaha labada usbuuc ee ugu horreysa dhalmada.

Haar: -Ha'da fudud- Calaamad jirka ka muuqata oo nabar ama dhaawac hore ah.

Haaruf: Nabarrada furuqa iyo candhada ay ku reebaan jirka.

Hafeefo: Xanuun yar oo laga dareemo meel jirka ka mid ah oo gubatay

Hamaansi: Fal iskiisa u dhaca oo uu afku u baahanayo in lakala qaado muddo 10 ilbiriqsi ah taasi oo ay keento dhafar, caajis ama jirro. Halaqyo, hanqalaaliyo, hanbalaaliyo.

Hambalaaluq: Meel jirka ka mid ah oo ay biyo galeen ama maqaarka iyo hilibka ay isdaayeen.

Hammeelliso: Cudur dadka ku dhaca oo qofka habeenkii uusan wax arkeyn, waxaa sababa nafaqa darro. Hameellow, hammeellisow, indhahabeenno.

Hano: Finan ama nabra madaxa kasoo baxa oo madax sumacyo u yeela ama hoolhoola.

Hayoomis: Cudur hindhiso iyo illin badan leh oo laga qaado hayaamisada/hayoomista. Hinjibiso, hayaamiso.

Heec: Diifta iyo itaaldarrada ka muuqata dad ama xoolo ay baahi, cudur, iwm hayaan. Dhacsaal.

Hergab: Cudur leh qandho, diif, qufac iyo hindhiso oo muddo gaaban socdo oo aad u faafa aadna la isu qaadsiiyo waxaana keena fayrus, waxa uuna ku dhacaa xubnaha neef mareenka. Duray, hargab, hargeb.

Hiimofiiliya: Dhibaato xagga xinjirowga ah taasi oo u gaar ah labka, kaasi oo awoodda xinjirowga dhiigga ay ka maqantahay. Dhiigyaac.

Hiiro: Sallaxyada iyo foodda madaxa oo si wadajir ah tinta kaga dhamaata una dhaqaaqa dhanka dhakada.

Hiirtaanyo: Xasuusashada ama gocashada xanuun ama dhibaata hore taasi oo caafimaadka dhib u geysankarto.

Hindhiso: Neef leh cadaadis badan oo si iskeeda ah oo kada uga soo booddo neefmareenka taasi oo marna qallalan marna wadata diif kanasoo baxda sanko iyo afka, taasi oo haddii ay saddex jeer ka badato cudur muujineysa. Hindhisyo.

Hingo: Neef si iskeeda ah oo kada ah uga soo booddo hungurimareenka iyo neefmareenka oo qaarka sare dhaqaajisa, taasi oo haddii ay badato xanuun ama dhibaato keenta.

Histeeriya: Cudur maskaxeed qofka ka dhiga qof aan daganeyn, caadhifad badan, go'aan laheyn, duufsasho iyo dhalanrogid u dabacsan, baqdin badan leh, waxa uu ka yimaadaa xaalado deegaan iyo dhaxaltooyo, waxaase sababa daciifidda ama jilcanaanshaha qofka maskaxda, dabeecadihiisa waxaa ugu caansan qofka in uu yahay qof markasta jecel in uu dadka ka qosliya ama maadeys sameeyo, iyo in uu u labista qaab ama uu ku labisto dhar maad leh, marka ay xaaladdu darantahay waxuu sababikaraa indhaha oo gaduuto, jiiraggo', wadne garaac badan, wadne xanuun, madaxfurad iyo dhinac dhac. Dhallaamo.

Holac: Xaalad cudureed ka dhalata isdifaaca jirka uu kaga hortagayo walxo kusoo kordhay sida jeermisyada, walxahaasi waxaa kamid noqonkara waxyaaba uu jirku ubaahanyahay sida borotiin ama dawooyin kale, isdifaacaasi waxaa ka dhashay barar, nabra, gaduud maqaarka ah iyo xanuun.

Holac-hunguri-cadde: Holac ama xanuun hunguriga cadka ay neeftu marto ah, waxaana keena caabuq ka yimid cunaha iyo sanko, waxa uu leeyahay qufac culus, waxa kamid yahay bahda borokiitada.

Holac-dulal: Holac ama xanuun dulalka sanko ah waxaana keena cudurra badan sida sanboorka.

Holac-kaadihays: Holac ama xanuun kaadihaysta ah oo ka dhashay bakteeriya, lehna kaadibadan iyo kaadida oo qofka gubta.

Holac-kaadimareen: Holac ama xanuun kaadimareenka ah oo ay keenta jabtada ama caabuqyada ka yimaada cudurrada galmada.

Holac-buruqeed: Holac ama xanuun ka yimaada buruq yar oo ku sameysanta cunaha iyo midhicirka, taasi oo marka ay midhicirta ku sameysanta keenta xanuun, shuban iyo calool fadhi. Holac-kiishyaro.

Holac-lafa-dhuux: Holac, hur ama xanuun dhuuxa iyo lafaha ah.

Holac-qabsineed: Holaca ama xanuunka uu dareemo qofka uu hayo qabsinka.

Holac-xuub-ileed: Xanuunka iyo hurka daboolka jilicsan ee isha taasi ay ay keento cudur ama ileys isha ku dhacayay muddo dheer.

Holac-xuub-ubuceed: Xanuun uurkujirta ah oo uu keeno jeermis dhiigga raaca.

Holac-xuub-wadneed: Xanuun laga dareemo daboolka kore ee wadnaha ee aan lug ku laheyn xididdada wadnaha.

Hongod: Tuurta dhabarka qeybtiisa sare ah ee aad aan u xoodsaneyn. Goobbo.

Hoolato: Cudur ku dhaca madaxa oo timaha baabi'iya.

Hordiyuulam: Nabar kasoo baxa halka ay iska qabtaan baarka iyo dahaarka isha waxaana keenta bakteeriya. Abuutuutuu', tuutuu'.

Howlgab-taran: Rabitaanka ragga iyo dumarka oo yaraada amaba gabi ahaanba meesha ka baxa.

Hub: Aalad kasta ee loo adeegsado dagaal.

Hud: Midhicirka oo soo fataha oo xuubka yar ee caloosha dillaciya ee soo dhexgala. Eerna.

Hule: Cudur meelaha jilicsan iyo qanjirrada gala, inta bandanna waxa uu ku dhacaa dhuunta.

Hurda-la'aan: dhafar ama soojeed oo uu cudur keeno.

Hurgumo: Boog ama xanuun hoose oo laga dareemo meel hore u jirraneyd oo u muuqatay in ay bogsootay. Cudur ama boog qarsoon oo xanuuneysa. Hurgun.

Idow: Cudur inta badan ku dhaca carruurta oo u daran hilibka idaha iyo waxyaabaha idaha ka yimaado, dadka miyiga waxa ay ku daaweynjireen dhiigga xoolaha oo qofka loogu qabeeyo iyo waxyaaba kale oo lagu qaaciyo/uumiyo.

Iin: Cillad uu qofku yeesho oo iskugu jirto cillad caafimaad, mid jireed iyo mid maskaxeed.

IL: Ileysiga quuriwaaga ah. Cuyuun; cayuun; jeedaal; maliilac, jalleeca, dhabateysi.

Ilfajaas: Cudur indhaha ku dhaca oo qofku uu maleynayo in ishu ay wax ku jiraan.

Ilkadawaco: Cudur carruurta yaryar ku dhaca marka ay ilkaha u soo baxayaan, oo sida la aaminsanyahay uu sababa tixri/galluun ka dhex dhasha miciyaha. Ilkadacawo, ilkow, miciyow. Sababaha cudurkan la iskuma waafaqsana.

Ilmud: Cudur indhaha ku dhaca oo illin badan ka keena.

Ilqayto: Cillad ama iin ay indhuhu yeeshaan oo aysan hal dhinac isku mar fiirinkarin.

Ilqod: Cudur ku dhaca indhaha.

Il-wareen: Cudur ku dhaca indhaha oo xanuujiya.

Indhacagaarshe: Cudur dadka ku dhaca oo indhaha cagaariya. Indhacagaarshow, cagaarshow.

Indhacaseeye: Cudur dadka ku dhaca oo indhaha caseeye ama guduudiya, waxaana keena fayrus ay gudbisno nooc khaas ah oo kamid ah kaneecada, waxa uuna burburiyaa nudayaasha beerka iyo kilyaha, waxa uu leeyahay maqaarka iyo indhaha oo casaada/gaduuta ama boorooba, qandho, madax xanuun, wareer, caloolfadhi, murqa xanuun, lallabbo iyo matag. Dhaayamidibeeye.

Indhahabeenno: Cudur dadka ku dhaca oo qofka habeenkii uusan wax arkeyn, waxaa sababa nafaqa darro. Hameellow, hammeellisow, hammeelliso.

Indhalaawe: Qof aan indhaha wax ka arkin. Dhaaya-la'aan.

Isfiillito: Cudur ka mid ah cudurrada galmada si weyna la isu qaadsiiyo, waxaana dhalisa bakteeriya, waxa uuna leeyahay barabaro ama boogo ku sameysma jirka. Waraabow, xabbad, bajo.

Iskufuran: Duleel/dalool ama jeex aan dabiici aheyn oo sameysma kaasi oo xiriiriya laba marin ama xubnood oo kala xernaanjiray, mararka qaar waxaa dhacda in uusan u gudbin meel kale oo marin ah balse uu meel dhexe ku dhamaado, kaddibna wixii marinka soo galo ay ku uruuraan oo ay ku cabburmaan godkaasi kaddibna waxaa sameysma wax sida nabar ama buro ahaan ah, cudurkan waxaa ugu caansan nowca ku dhaca dumarka ee isku fura xubnaha taranka iyo saxarada. Fiistula.

Isnadaamis: Cudur dadka iyo geelaba ku dhaca oo oogada jirka kasoo dhaliya nabarro cuncun badan leh, nooca dadka ku dhaca waxaa keenta bakteeriya ka dhalata nadaafa darrada, reer miyigu waxa ay ku daaweeyaan marsashada dhiinka geedka gooragoyga. Candho.

Istaroog: Dhiigga oo maskaxda ka xerma ama ku furma taasi oo keenta xaalad kada ah oo uu qofka la miirdaboolmo, haddii ay saacado sii jirtana unugyada

maskaxda waxa ay waynayaan ogsijiinka kaddibna way dhimanayaan, taasi oo khatar badan galinkarta nolosha qofka. Faali, faalij.

Jaawqarrar: Cudur dadka iyo duunyadaba raafafka/jiilasha ama cagta ka gala oo dillaaciya. Jaaw.

Jabto: Cudur ku dhaca xubnaha taranka, waxaana ka yimaada dheecaanna kala duduwan, waana cudur la is-qaadsiiyo, waxa uuna ka mid yahay cudurrada galmada, waxaana keena baktiiriyada, waxa uuna keenaa dhalma la'aan. Gale.

Jac: Biyo kulul oo ka dhashay biriqda oo noolaha laaya haddii ay soo gaaraan.

Jacjacle: Jirro dadka madaxa ka bararisa.

Jadeeco: Cudur carruurta ku badan oo leh calaamadaha hergabka aadna la isu qaadsiiyo, waxaana keeno fayrs, waa cudur sanadle ah oo safmar ah, waxa uu leeyahay qandho kulul iyo nabro gadgaduudan oo jirka kasoo baxa iyo kasoobax carrabka salkiisa ah. Kululo.

Jajab: Xanuun murqaha ku dhaca oo qofka ka dhiga sida in waahyahiisa lakala jiiday.

Jajabow: Xanuun qabatin yaryar leh oo ku dhaca haweenka uurka leh marka sidkoodu soo dhowaado.

Jalleeca: IL si jeedaal ah qofka loogu fiiriyay oo majeerasho ama quuriwaa la socoto, oo sida la rumeysanyahay cudur uu ka dhasho. Quuriwaa, maliilac, qumayeysi, dhabateysi, ileysi, cuyuun, cayuun, jeedaal.

Jan: Jamasho ama jecleysi oo sida cudurrada oo kale qofka ku qasbayo waxyaaba gaar ah oo mararka qaar helitaankoodu uu adagyahay.

Jarribaad: Imtixaan, ibtilo, camaltus.

Jaynaf: Qolofa adag ee uu jirku yeesho qabow ama kuleyl dartiis.

Jeeniwareen: Xanuun qandho iyo qufac badan leh lehna calaamadaha hergabka. Oofwareen.

Jibaax: Cudur leh qufac culus oo dadka iyo xoolaha ku dhaca.

Jiiraggo': Xanuun laga dareemo muruqyada oo uu keeno wax culus oo uu qofku qaado, daal, cudur ama jug jirka soo gaartay. Cadgo'.

Jiiraggo'a hunguriga: Xaalad dagganaansho la'aan oo ka jirto hunguriga oo ay murquhu ku fashilmaan ka jawaabcelinta rabitaanka qofka ama niyadda, taasi oo sababto culeys xagga liqitaanka ama dhuunjinta ah, cadaadis ama xanuun laabta ah, xanuun ku faafa dhinaca bixid ee jirka, mararka qaar bukaanku waxa uu u maleynayaa in uu qabo wadne xanuun. Cadgo'a hunguriga.

Jiririco: yamcuur yaryar oo godka xaadda kasoo taagma islamarka uu qofku dareema kuleyl, qabow ama naxdin.

Jiis: Mid kamid ah labada lugood oo dhib gaaray ama gaaban kaddib socodka oo aanan hagaagsaneyn. Dhutin, laangare.

Jirro: Isbeddel ku dhaca jirka noolaha oo wax u dhima caafimaadkooda. Bugto, fayooobi la'aan, cudur, xanuun.

Jirxumo: Caatanimada iyo nafaqadarrada jirka ka muuqata.

Joqofey: Boog aan dhaqso u bogsan, reysan ama shifan.

Jumbur: Buro ama nabar weyn oo aan boog aheyn oo dhabarka ama shafka kaga soo baxa kaasi oo dib u dhiga korriimadiisa.

Juuc: Daal xanuun yar leh. Juucjuuc.

Juudaan: Cudur halis ah oo la isqaadsiiyo oo waxyeelleeya maqaarka iyo dareemayaasha waxa uuna ku badanyahay waddamada cimilada kulul leh.

Kaadibaxsad: Cudur hoos u dhiga awoodda kaadicishiga oo qofka uu ku dhaca kaadida ka baxbaxsato. Baxsad.

Kaadicaso: Cudur dadka iyo xoolaha ku dhaca oo kaadida caseeya, waxa uu sii badanyahay xilliyada kuleylaha ama ay biyuhu yaryihiin. dh.

Kaadidhiig: Cudur inta badan ku dhaca dadka ku nool waddamada kulul, waxaana laga qaadaa biyaha wasakhda ah waxaana calaamadahiisa ka mid ah kaadida oo uu dhiig soo raaca. Bilhaarsiya.

Kaadigubasho: Xanuun kaadimareenka ah oo uu qofku dareemayo marka uu kaadinayo.

Kaadimacaan: Cudur ka dhasha marka uu beeryaraha ama ganaca soo saariwaaya maaddada insuliinta ee maareysa sokorta ama uu wax yar soo saaro amaba uu jirku si fiican u isticmaaliwaayo maaddadaasi, kaddib waxaa timaada in sokorta ay dhiigga ku badata kaddibna si qashinsaar ahaan kaadida loo raaciya. Kaadisonkorow.

Kaadiqabad: Cudur kaadida ku xera ama ay gubta oo dadka iyo xoolahaba ku dhaca.

Kaadishiil: Cudur sababa in qofku ay kaadida gubta.

Kaalshibeel: cudur inta badan carruurta ku dhaca oo ka dhasha yaraanshaha kaalshiyomka, kaddib waxaa yimaada gadaf iyo tinta oo casaan ama caddaad noqota. Rekatsiya.

Kaankara: Cudur ka dhash nudayaasha jirka oo dhibta marka uu goobtu gaariwaayo dhiigga iyo naqaska lasocda.

Kaar: Xanuun daran oo dikaan iyo uumid ah oo meel bugto laga dareema.

Kabud: Cudur oogada jirka u yeela nabarro badan oo buruqya ah oo baruur adag leh

Kabaabiyo: Dareemaha xubnaha jirka qaar ka mid ah oo is dhimma dhib soogaaray darteed ama tagista dhiigga oo ku yaraatay ama qulqulka dhiigga oo xawaarahiisu yaraaday. Kabuubiyo.

Kabrar: Barar, fashfash, xalxal, hulaaq.

Kaduudiye: Cudur dadka iyo xoolaha ku dhaca oo waaxyaha jirka soo laabo, dhaqdhaqaaqana u diida. Kuduudiye, kuduudshe.

Kalaamiddiya: Cudur ku dhaca dadka iyo shimbiraha oo uu keeno jeermis u dhaxeeya fayrus iyo bakteeriya. Qalabiso, teetano, dhakabiye, kojiye, todobamagaarto.

Kalaguur: Cudur carruurta ku dhaca oo madax weyneeya.

Kaliyow: Cudur maskaxeed ku dhaca qofka oo kalinimada jecleysiiyo.

Kansar: Buro sida carsaanyada oo kale dhinac waliba u fidda, waxa ay ka sameysantaa unug si dhaqso ah u qeybsama una kora, waxa ayna ku faaftaa dhammaan nudayaasha la dariska ah, waxaa dhicikarta in unugyo ayada ka mid ah ay raacaan dhiigga kaddibna ay ku buro kale ku sameysanta meel kale oo jirka ka mid ah. Carsaanyo, feex.

Kansar-beereed: Burobahalaad ku dhalata beerka waxay ku badantahay waddamada kulul, mararka qaar waxaa sababa cudur sida cagaarshowga beerka.

Kansarka dhuuxa: Cudur ka dhashay unugyada dhiigga cadcad oo aad u bata, waxa uu keenaa dhiigyari mararka qaarna waa loo dhintaa.

Kansarka sambabka: Kansarka ku dhaca sambabbada oo inta badan uu sababo jiididda ogsijiin aan u habbooneyn sambabbada sida sigaarka.

Kansar-keene: Onkojiin.

Kardho: Dhaxan ama xanuun lala gariiro ama dardhasho leh.

Karoona: Cudur leh calaamadaha hergabka marka laga reebo diifka waxaana sababa fayrus kala noocnooc ah waxa uuna dhaawacaa sambabaha, kelyaha iyo qeyba kale oo xubnaha muhiimka ah ka mid ah, marka ay darantahay dhibaataada uu u geystay sambabaha waxaa fashilma howshoodii kaddibna waxaa yimaada neefqabad daran.

Karood: Cudur si degdeg ah wax u dila.

Kasoobax: Nabar weyn oo oogada jirka iyo uurkujirtaba ka soo baxa.

Katatbi: Sixir, tafaaful, shulug.

Kiish-dabac-halbowle: Kiish dhiig ka buuxa oo ku sameysma halbowlaha, waxaa keena xididdada oo meel ka dabca, wuxuuna sababikaraa xaalad kada ah oo khatar ah.

Kirkir: Cudur bulshadeed ragga kaga dhaca xubibta taranka oo inta hore gooya, lagana qaado galmada, waxaa kale oo lagu magacaabaa nabar astaan u ah cudurka waraabowga.

Kix: Cudur aad u faafa oo inta badan carruurta ku dhaca oo leh qufac iyo neefjiid xiriir ah oo qaylo leh. Xiiqdheer, jix, hiiqleey, qix.

Kojiye: Cudur aan si toos ah la isu qaadiinin oo ka dhasha jeermis jirka ka gala meel dhaawac ah, waxaana ka dhasha sun daran oo dhiigga raacda kaddibna si

daran u saameysa murqaha kana joojisa dhaqdhaqaaqa ee togta ama kojisa. Kujiye, toddobamagaarto, teetano, dhakabiye, qalabiso

Kolaytis: Hur iyo xanuun laga dareemo midhicirweynaha waxa uu sababaa shuban mararka qaarkood ay la socdaan dhiig iyo axal.

Koolba-aariyo: Xanuun ka dhasha dabeyl kulul ama qabow oo jirka gasha. Oofwareen.

Korostarool: Baruur dagta xididdada dhiigga oo yareysa qirada xididdada taasi oo habsaamisa ama curyaamisa qulqulka dhiigga. Dufin.

Koxato: Cudur jirka dadka siiba hareerraha indhaha ku dhaca oo nabarro cuncun leh u yeela. Caanakoxato, caanagocato.

Kubadhagaxow: Adkaanta caloosha iyo caloolfadhiga.

Kud: Cudur dadka iyo xoolahaba ku dhaca oo badanaa aan laga kicin oo si dagdag ahna wax ku dila.

Kudekude: Noole ka dhexdhasho jirka dadka iyo xoolaha ee ay sababta qaniinyada cayayaanka. Dhase.

Kul-dhibib: Xaalad cudureed oo ka dhalata xubnaha jasuureeya kulka jirka oo howshoodi gaba taasi oo keenta in uu kor u kaca heerkulka jirka, dhidid la'aan iyo miyir beel.

Laabjeex: Kulayl iyo xanuun wada socda oo laga dareemo jadiinka iyo caloosha, mararka qaar waxaa yimaada balqan ama matag kulul. Laabqarrar, gaas.

Labeeb: Xaalad lagu dhasho oo qofku xubinaha taranka ragga iyo dumarka kuwada yaallaan.

Lafaholac: Hur xagga lafaha ah.

Lafa-xanuun: Xanuun xagga lafaha iyo kalasiibyada ah. Roomaatisam. Jiiraggo'.

Laf-guri: Laf ama shey adag oo ka dhex dhasha xubinta taranka dumarka.

Lagu-dhasho: Xaalad ama cudur lagu dhasha oo korsiiimada qofka habsaamiya amaba qeyba jirka kamid ah saameeya oo ka baddalo habkii dabeeciga aheyd, qaatkood waa la iska dhaxlaa qaarna waxaa sababa sun ama dhibaato soo gaartay deegaanka.

Lahan: Raad waxyeello leh oo qarsoon oo uu reebo cudur, nabar iwm.

Lakab: Cillad ilkaha la xiriirto oo ay iskasoo dhinac dhashaan taasi oo ay sabab u tahay in ilkihii da'a yaraanta ku dhicilahaa aysan dhicin amaba la ridin ama cillida kale oo cirridka uu leeyahay.

Lallabbo: balqan ama matag uu sababo xanuun.

Lalleemo: Gariir gacmaha dadku yeeshaan gabow ama jirro awgeed.

Laqanyo: Sas. Liidaanyo. Lallabbo.

Lawlaw: Gariir ama isku dhexyaac iyo dhacdhac xagga hadalka ah uu yeesho qof gaboobay. Gariir.

Laxaw: Kaarka iyo xanuunka laga dareema jirka kaasi oo ay keentay boog, dhaawac ama jirro.

Liidaanyo: Dareen jirka saaqa oo ka dhasha xanuun ama cunto la cunay, marka uu daranyahay waxa uu keenaa matag. Laqanyo, lallabbo, ladaadyo.

Liinfoomo: Buro xun oo ka baxda qanjirrada liinfada. Kansarka qanjirrada liinfada.

Liinfoogaranuloomo: Cudur ku dhaca xubnaha taranka oo ka mid ah cudurrada galmada oo ku badan waddamada cimilada kulul, waxaana keena kalaamidiya, mararka qaar waxa uu xeraa xididdada liinfada ee ku yaalla xubnaha taranka.

Lo'doon: Cudur dadka ku dhaca oo neefta lo'da lagu daaweeyo.

Lowgal: Cudur jilibka ku dhaca oo biyo geliya.

Lugyaro: Cudur ku dhaca lugaha oo lugtii uu ku dhaca ay ka gaabato ama ay ka yaraato lugta kale, inta badan waxa uu saameeyaa dhaadda (halka kubka ugu hooseysa) ka kor.

Luqun-jab: Qoor xanuun, barkin ka dhac.

Macaan: Cudur ka dhasha marka uu beeryaraha ama ganaca soo saariwaaya maaddada insuliinta ee maareysa sokorta ama uu wax yar soo saaro amaba uu jirku si fiican u isticmaaliwaayo maaddadaasi, kaddib waxaa timaada in sokorta ay dhiigga ku badata kaddibna si qashinsaar ahaan kaadida loo raaciya. Kaadisonkorow, kaadimacaan.

Macluul: Tabardarro ka dhalata nafaqo-darro ama jirro. Gaajo.

Madaxfarad: Wareer iyo xanuun madaxa ah oo qofka xanaaqu uu ku badanayo.

Madaxfurad: xanuun uu keeno dhiig maskaxda ku furmo, inta badanna waxaa keena xidid ciriirsamay oo meel kale cabburiyay ama xaddiga dhiigga oo ku kordhay xididdada maskaxda kaddibna qarax ama dillaac ayaa yimaada.

Madax-laxaw: Xanuun madaxa ah oo uu sababo xawaaraha qulqulka dhiigga oo ka yaraada intii caadiga aheyd, mararka qaarna uu ka bato "xaaladda khatarta ah".

Madax-wareer: Nooc kamid ah madax-xanuunka oo uu walaax la socdo.

Madax-xanuun: Xanuun madaxa laga dareemo.

Magaag: Jirro dadka ku dhacda oo ka timaada yaraanshaha ama waauidda nafaqada laga hela caanaha iyo hilibka.

Majiir: Xanuun daran oo qabatinkiisu daqiiqad ka yar isujiraan oo caloosha iyo midhicirrada laga dareemo, qofka mararka qaar waxa uu ku nafisaa neefsiga. Caloolmajiir.

Majin: Xanuun cunaha ku dhaca oo mararka qaar barariya oo qofku uu ku dhibaatoonaya liqitaanka. Majinow, majimow.

Mal: Cudur dadka iyo duunyada kaga dhaca kala goysyada oo kaduudiya.

Malax-dareer: Cudur ku dhaca nudayaasha curuqda ah ee haya ilkaha waxaana keena bakteeriya ka dhalata huurada/dhacarta waxaana yimaada malax fadhiisata ilkaha salkooda kaddibna way bololaan.

Maliil: Tabardarrada iyo diifta ka muuqata qof muddo badan uu xanuun hayay ama ay macluul gaajo ka dhalatay hayso. Mariil, marliil.

Maliilac: Quuriwaaga dhaliyo in qofka wax haysta uu la xanuunsado. Qumayeysi, ileysi, cuyuun, cayuun, jeedaal, jalleeca.

Mallaariya: Cudur qandho qabow iyo kulayl isugu jirta leh oo dadku ka qaadaan kaneecada nooceda dheddig. Duumo.

Maqaardhac: Cudur maqaarka ku dhaca oo muddo dheer lehna haaro qolof leh oo cuncun badan oo inta badan ku sameysma addimada, xaglaha iyo madaxa.

Maraarnimo: Xaalad cudureed oo lagu dhasho kana timaada yaraanshaha dheecaanka uu soo deeyo qanjirka mirguudka ee kuraca hoostiisa ku yaalla, waxa uuna ka qeybqaataa korriimada jirka iyo garaadka, xaaladdaasi qofka ku dhasha korriimada ayaa ka xumaato waxa uuna noqdaa qof gaaban, suuradda madaxiisa iyo wajigiisa ay baddalantahay, caqli dhiman.

Margasho: Raashin, qudaar ama dabin qool ah ku margasho.

Mareeg: Xaalad cuuryaannino ah oo lagu dhasho, waxaana sababa tubbada nafaqada ugudbiso uurjiifka ee xundhurta/xuddunta kasoo baxda ee mandheyrtu la xiriirta oo cunugga qoorta kaga duubanta/mareegsanta sida qoolka oo kale, taasi oo sababta in ay yareyso ama ay jarto nafaqadii iyo naqaskii uu cunuggu u baahnaa, marka nafaqada iyo naqaska ay jarto cunuggu wuu dhimanayaa laakin marka ay yaraadaan waxaa imaanaya in jirku uusan helin nafaqa iyo ogsijiin ku filan, xaaladdaasi waxa ay keentaa in ay timaaso cillad xagga korriimada xubnaha jirka ah, taasi oo qofka ku sababta in uu noqdo cuuryaan, waxaa kamid noqonkara dhaqdhaqaaqa xubnaha oo uusan xakameynkarin, hadal la'aan iyo xaalado dhimireed.

Maroodiyow: Cudur lugaha barariya oo dadka iyo xoolahaba ku dhaca; abeesow.

Maskaxgaraad: Cudur khatar ah oo si daran u xanuunjiya dahaarka maskaxda iyo xangullada, waxa uu leeyahay madax xanuun daran, wareer ogaalka gaara kaddibna miirdaboolmid, matag, iyo qofka oo dhibsada iftiinka iyo codka, waxaana keena fayrus iyo bakteeriya labaduba oo sida dadka qaar ay aaminsanyihiin meelaha ay ka yimaadaan in ay kamid tahay qaniinyada hoosaharraha/kudkudaha. Meninjaytis, menijiito, qoorgooye.

Matag: Cuntadii caloosha tagtay oo dib usoo laabato oo xanuun dartiis qofka soo dhaafto.

Mayiiko: Faalnaanta iyo mamanaanta qofku uu ku mamanyahay galmada ama jimaaca, taasi oo inta badan ku sababta in uu ku dhaca sina.

Meelanooma: Buro khatar ah oo inta badan ku dhacda maqaarka oo kamid ah bahda kansarka, waxa ayna ka sameysantaa unugyada sameeya midibeysada, waxaa sababikara cadceedda oo waqti badan ku dhacda maqaarka.

Menijiito: Cudur khatar ah oo si daran u xanuunjiya dahaarka maskaxda iyo xangullada, waxa uu leeyahay madax xanuun daran, wareer ogaalka gaara kaddibna miirdaboolmid, matag, iyo qofka oo dhibsada iftiinka iyo codka, waxaana keena fayrus iyo bakteeriya labaduba oo sida dadka qaar ay aaminsanyihiin meelaha ay ka yimaadaan in ay kamid tahay qaniinyada hoosaharraha/kudkudaha. Meninjaytis, maskaxgaraad, qoorgooye.

Miciyow: Cudur ilkaha ku dhaca gaar ahaan miciyaha, oo sida la aaminsanyahay uu sababa tixri/galluun ka dhex dhasha miciyaha, badanaa waxa uu ku dhacaa carruurta. Ilkadawaco, ilkadacawo. Jiritaanka cudurkani la iskuma waafaqsana.

Midab-arag-la'aan: Xaalad cudureed oo qofka araggiisu uusan kala saarikarin midabyada qaarkood, gaar ahaa cagaarka iyo gaduudka.

Mingis: Rooxaan ama jinni la rumaysanyahay in uu dadka cudur u keeno oo ciyaar lagu daweeyo.

Mirguudsumow: Sumow ka dhasha sare u kac ku yimaada hormoonnada qanjirka mirguudka ee ku yaallo kuraca hoostiisa, kuwaasi oo ku bata dhiigga kaddibna waxaa halkaasi ka dhasha sumow, waxaana yimaada wadna garaac badan iyo kacsanaan maskaxeed.

Miyelooma: Kansar ku dhaca unugyada balaasmaha noociisa B, taasi oo keenta in ay bataan kaddibna dhex fadhiistaa dhuuxa lafaha oo ay ciriiriyaan halkaasina waxa ayna dhib weynu geystaan dhuuxa iyo lafaha.

Miyirbeel: Suuxdinta iyo kala garanwaaga ku yimaada xanuu, ama dhaawac gaaray qofka. Dhimirbeel.

Mongoliisam: Xaalad dhimmanaasho ka dhalata isbaddal ku yimaada koromsoomka 21 oo ah 2 koromsoom oo noqonata 3 koromsoom, taasi waxa ay

keentaa in qofku uu jir ahaan iyo garaad ahaanba dhimmanaado ama qeybka ka mid ah jirka oo qaabkii la yaqaannay si aan aheyn u sameysma sida indhaha oo qaab kale u jeexma sida dadka mongooliya. Firguur.

Murgacasho: Lafta oo falliir ama jug u dhaw jab ay soo gaarto.

Muqlo: Cudur ku dhaca dadka iyo duunyada oo bukaanka socodkiisa miisaanka ka dhumiya, nowca duunyada ku dhaca waxa ay ka qaaddaa qaniinyada shilinta, kan dadka ku dhacana waxaa kale oo loo yaqaannaa duuduuf, duufduuf.

Muruq: Xanuun ka yimaada muruq gala meel aan meeshiisii ahayn, inta badan waxaa sababa qaadidda wax culus.

Muruq-roor: Muruq isdhexgalayo, mararka qaar waxaa sababa cudur ama curyaannima.

Murqoxanuun: Murqo xanuun ka dhasha isdhexgalka murqaha.

Naaf: Qof ama xayawaan ay ka maqanyihiin qaar kamid ah xubnaha waaxyaha sida lugaha, gacmaha, indhaha iyo goobo kale oo muhim ah ama dhaawac xagga neerfaha ah oo qofka u diidaya in uu saxo hannaan socodka, hadalka iyo waxqabadka.

Nabar: Fin weyn, dakhar ama dhaawac jirka soo gaara.

Nabar-dhaw: Xaalad kadis ah oo jirka ama dhinac ka mid ah laga dareemo oo mararka qaar qof galiso miirbeel ama khafiiqid oo sida la aaminsanyahay uu sababo jinni qofka taabtay ama garaacay. Dhufasho.

Nabar-kul: Tabardarro saa'id ah oo ka dhalata hoos u dhaca cadaadiska dhiigga, taasi oo ka dhalata kuleyl daran oo jirka ku dhacayay muddo dheert.

Nafaqadarro: Macluul ka dhalata gaajo ama cunidda raashin aan isu dhiillatirneyn

Nafsi: Cudur iyo xanuun aan jirin ama cuqdad qofka ku beeranta.

Naqas: Cudur ku dhaca dadka oo neefsashadu ay dhibto. Neef.

Neef: Cudur dadka ku dhaca oo neefsashadu dhibto. Naqas.

Neef-qabatin: Dhibaato xagga neefsashada ah, waxaana keenikara cudurro sida xasaasiyadda, burukiitada iyo fayruska karoona.

Neerfe: Xaalad falcelis qaldan ama gadood ay sameeyaan dareenwadayaasha jirka taasi oo keenta cillad, kacsanaan ama xanuun ku yimaada neerfayaasha.

Neyuroosis: Cudur dhimireed qofku lagu arkayo isbadbadalka badan ee ee ku saleysan caadifadda taas oo qofka ku keenta in uu lahaado dhaqan iyo fikir duwan.

Niyad-jab: Dareen quus ah ama cudur maskaxeed keena qofka in uu ka caajiso qabashada howl uu ku taamayay in uu qabto.

Noog: Dareen caajis ama juuc ah oo laga dareema murqaha gaar ahaan marka uu qofku qabto howl adag.

Ooddin: Xanuun laga dareema meel jirka kamid ah gaar ahaan murqaha oo qofka marka uu dhaqaaqo xanuunta. Muruq.

Oof: Xanuun daran oo saableyda ku dhaca. Oofwareen.

Oofwareen: Cudur qufac iyo qandho leh oo saableyda iyo neefmareenka ku dhaca. Qaarjeex, wareento, burukiito.

Qaamowqanshiir: Cudur ku dhaca qanjirada oo barariya, mararka qaar waxaa sababa afuudidda culus. Canbafuuf.

Qaarjeex: Cudur sambabada iyo neefmareenka dhaawaca oo leh qandho iyo qufac daran. Oofwareen, wareento, burukiito.

Qaarxabaal: Cudur ku dhaca qeybta danbe ee jirka, laguna daaweeyo qaarka danbe oo dhulka lagu aaso.

Qaaxo: Cudur xun oo la is qaadsiiyo oo ku dhaca sida badan sambabbada dadka, xoolaha iyo shimbiraha waxaana keenta bakteeriya waxa uuna leeyahay qandho, qufac wata xaaqo dhiig lasocdo, madax-xanuun, tabardarro, dhidid habeenkii ah iyo gariir. Urug, feero, feero-sanbab.

Qabandhaco: Jaririco ka dhalato naxdin, dhaxan ama jirro oo oogada jirka ku fidda. Jaliiliyo.

Qabatin: Xanuun mar mar dadka qabta. Eyddin, nabar.

Qabatoon: Cudur qabatin leh oo soo noqnoqda.

Qabsin: Xanuunka qabsinka oo ka dhasha qashin adke noqday oo dhexfadhiista mindhicirka.

Qalabisa: Cudur laga qaada birta oo qofka qaba uu ilkaca isku riiqo, carrabkuna iska ruugo. teetana, todobamagaarto, dhakabiye, kojiye, kalaamidiyo.

Qal-aboodi: finiinac yaryar oo cuncun leh oo oogada jirka ka soo yaaca marka ay qorraxdu kulushahay. kulayaaha.

Qalaw: Xanuun ku dhaca kalagoyska cududda iyo garabka.

Qallal: Cudur maskaxeed suuxdin iyo gariir keena oo qofka uu ka tagayo ogaalka iyo hadalka. Nus-koomo.

Qalloocow: Cudur afka qalloociya. Af-qalloocow.

Qaloon: Jirro ku dhacda qoorta oo bararisa.

Qandha-dengi: Cudur la is qaadsiiyo oo fayrus keena lehna qandho, madax xanuun, murqo xanuun iyo finan cuncun leh oo oogada jirka kasoo baxa.

Qandhagalti: Xanuun qandho leh oo aanan laheyn wax calaamado ah oo ku dhaca qof yimaada meel uusan hore u joogi jirin.

Qandha-hurdo: Cudur ku dhaca dadka iyo xoolaha oo uu sababo diriskunoole uu gudbiyo mid kamid ah tixsiyada/tuqsiyada oo ku badan afrikada dhexe, marka hore waxa uu weeraraa hab-dhiska neerfaha waxa uuna keenaa qandho, isku dhexyaac hurdada ah, madax-xanuun, cuncun iyo kalasiibyada oo xanuuno, waxa uuna ka mid yahay cudurrada dilaaga ah.

Qandha-raggaal: Qandho cimila-gooreed xilliga jiillaalka loo baxayo ee raggaalka loo yaqaanno kana horreeya xilliga hogada/kaliisha si safmar ah iyo si isku mar ah dadka ugu dhacda, balse waayahan danbe lama arkin, xog cadna lagama hayo waxa sababa qandhadaasi.

Qandho: Xanuun jirka laga dareema oo uu sababo cudur, dhaawac, nabar, sun ama jeermis galay jirka ama waxyaaba kale, xaaladdaasi waxa ay sare u qaaddaa heerkulka jirka oo gaara 37° C iyo wax ka badan. Hugaar, jirro, xummad.

Qandho-baraatifo: Cudur la is qaadsiiyo oo leh qandho, shuban iyo yamcuur kasoo baxa shafka, waxaana keenta bakteeriya.

Qandho-tifow: Cudur la is qaadsiyo oo ku dhaca dheefshiidka lehna qandho, tabardarro, shuban, yamcuur kasoo baxa shafka, dhaxan, dhidid iyo dhiigbax ka yimaada mindhicirrada oo dhaawac gaaray, waxaana keenta bakteeriya.

Qaniinyo: qaniinyada dhul socotada sida harraanka, bulacyada iyo masaska.

Qanjirbarar: Xanuun iyo barar ku yimaada qanjirrada gaar ahaan kuwa waraqda ku yaalla, inta badan waxaa sababa nabar ama dhaawac soo gaara meel qanjirkaasi u dhow, mararka qaarna waxaa keena cudur. Qirirbarar.

Qaras: Walxa wasaq ah oo mid cagaarah leh oo calooshu ku uruuro oo sababa xanuun lallabbo iyo afka oo qaraar noqda leh. Dacar, dacaar.

Qaranqaaro: Malaxda iyo dhiigga ku guntama nabar ama meel uu dhaawac gaaray.

Qaraw: hadalka qof hurdaya uu hurdayo inta badan waxa uu yimaadaa qofka marka uu xanuunsanyahay.

Qardow: qandho ka dhalata quwaax ama miro aan bislaanin oo la cuno, waxaa kale oo lagu magacaabaa murmuruxa salka kaddib fadhiga dheeraada.

Qarfad: Maqaarka jirka oo adkaada oo jilifeysta cudur ama dhibaato kale darteed.

Qarjab: Cudur ku dhaca dadka iyo xoolaha oo si ba'an u laayo oo uu keeno fayrus ay gudbiso kaneecada, markiisii hore waxaa lagu arkay dooxada qarjab ee kenya, waxa uu leeyahay qandho, madax xanuun, murqa xanuun, cillad shaqada beerka ah. Rifti-faali.

Qarqaryo: Gariiridda ay dhaxan ama jirro keento. Dardhasho.

Qarracan: Dareen xanuun leh oo qofka ku dhasha marka uu wax naxdin leh ku yimaadaan.

Qarrar: Jeex-jeex ku dhaca maqaarka gaar ahaan afka qarkiisa ama meelo kale oo dhaqaaq badan leh oo jirka kamid ah, waxa uu badanaa ku dhacaa carruurta, mararka qaarna waxaa sababa waraabowga.

Qataar: Nooc sixirka ka mid ah oo inta geed musmaar lagu taago isla markiiba qofka la sixraayo xanuunsanayo.

Qawid: Cudur aan dhib weyn laheyn oo maqaarka dadka ku dhaca oo barabaro cadcad leh. Qawad, caar, cambaarcad.

Qawrar: Dildillaaca jirka ku yimaada marka kuleyl ama qabow uu ku dhaca.

Qayir: Gubnaasho iyo doorsoon ku dhaca midabka maqaarka siiba wajiga, waxaana keena dhiigga oo goobtaasi ku yaraada cillad uu la gaariwaayo ama dhiig la'aan darteed.

Qoon: Cudur.

Qoorgooye: Cudur khatar ah oo si daran u xanuunjiya dahaarka maskaxda iyo xangullada, waxa uu leeyahay madax xanuun daran, wareer ogaalka gaara kaddibna miirdaboolmid, matag, iyo qofka oo dhibsada iftiinka iyo codka, waxaana keena fayrus iyo bakteeriya labaduba, meelaha ay ka yimaadaan waxaa ka mid ah qaniinyada hoosaharraha/kudkudaha. Mininjaytis, maskaxgaraad, qoorgooye, minijiito.

Qufac: Cudurka qaaxada oo ku dhaca sanbabbada.

Qushqush: Calool xanuun ka dhasha cunto kala jaadjaad ah oo la cunay, kaddib dheefshiidla ayaa ku daalaya maareynta cuntadaas kaddibna shaqada ayuu ka nasanayaa kaddibna waxaa jimaada calool xanuun, lallabbo iyo mararka qaarmatag. Daacashiir.

Quun: Xanuun qanjirrada afka salkiisa ku yaalla ku dhaca. Majin, majinow, xoqato, qun.

Quuriwaa: IL si jeedaal ah qofka loogu fiiriyay oo majeerasho ama quuriwaa la socoto, oo sida la rumeysanyahay cudur uu ka dhasho. Maliilac, qumayeysi, dhabateysi, ileysi, cuyuun, cayuun, jeedaal, jalleeca, xasad.

Raabbiya: Cudur ku dhaca dadka iyo xawaannada dhiigga kulul, waxaana sababa fayrus, waxa uuna ku dhacaa maskaxda iyo xangullada ee xoolaha dhiigga kulul, waxaana sida badan dadka u gudbiya qaniinyada ey cudurka qaba, waxa uuna

leeyahay qandho, nacbeysiga biyaha iyo shanqartooda, culeys neefsiga ah, dhareer iyo curyaannimo ugudanbeyntii, waxaa jira xaalado aanan la isku waafaqsaneyn balse si dhif ah loo diiwaangaliyay oo ah in uu bukaanku yeesho dhawaqa eyga, taasi oo ay soo wariyeen dad goobjoogayaal u ahaa xaaladahaasi dhifka ah, sida la sheegay xaaladdaasi waxaa sababa dhibaataada uu u geysto fayruskaasi maskaxda kaddibna qofka codka ayaa ku xermo, marka uu rabo in uu hadlo ama taaho ama dhawaaqo codka kasoo baxayo ayaa noqonaya codkaasi dhawaqa eyga shabbaha, balse ma aha in uu qofku cod ahaan isu baddalay ey. Raabbito, carow, biyonaceyb.

Rabboow: Qolof cad oo madaxa yeesho marka uu basaaso. Toxob, agool.

Rigaax: Daal iyo jiiraggo'

Riix: Jirro dadka iyo xoolaha ku dhacda oo lafo xanuun leh oo riixriixidda lagu daaweeyo. Tuf, roomaatisam.

Riiraxyo: Qufac badan oo isdabajoog ah oo ka dhasha xajiin taabata tubbada neefmareenka waxaana keena cudurrada neefmareenka.

Riyaax: Cudur dadka ku dhaca oo ay sababto nafaqadarro.

Roobsugow: Finiinac ama yamcuur yaryar oo oogada jirka ka soo yaaca waqtiga kulaylaha ama hogada ah. Xaraarad.

Roqor: Qolof ama jilif madow oo jirka kasoo muuqata oo bocol ama gafana dhan ama ka weyn. Honqor.

Saaris: Cudur ka mid ah cudurrada neefmareenka oo uu sababo fayruska lagu magacaabo saaris, waxa uu kamid yahay bahda karoonaaha oo si weyn u wacyeelleeyo sambabka taasi oo mararka qaar keento culeys neefsiga oo mararka qaarna loo dhinto.

Safmar: Cudur kasta ee si kadis ah u dillaaca oo dad ama xoolo badan mar ku wada dhaca si dhaqsa ahna u faafa.

Salal: Naxdin iyo argagax dartiis oo hurdada lagala soo boodo.

Saliiliyo: Xanuun ama qutquta/xanxanta laga dareema ilkaha marka ay dabeyl taabato, taasi oo ay keento marka ilkaha lagu cuno wax dhanaan ah sida liinta, cambaha iwm.

Sambac: Qof caqli liito. Nacas, dhabakool.

Sanboor: Cudur sanko dadka ku dhaca oo hindhiso badan iyo san cuncun leh, waxyaabaha aadka u kiciya waxaa ka mid ah boorka ciidda iyo raashinka iyo waxyaabaha la isku carfiyo ama la marsado ee lagu dhaashto.

Sanqo: Cudur ku dhaca dadka, geela, doofaarka iyo shimbiraha, waxa uuna leeyahay dhammaan calaamadaha hergabka balse way daranyihiin wuuna ka khatar badanyahay, dhimashadiisuna waxa ay gaartaa 0.1%.

San-goror: Dhiig sanko ka yimaada xanuun madaxa ah awgiis. Dhiig-goror.

Sarco: Cudur maskaxeed dadka ku dhaca oo lala suuxo. Qallal.

Sardhaban: Cudur gaar ah ama cudur kasta oo khatartii laga filayay aad uga hooseeya.

Sarkooma: Kansarka ku dhaca nodayaasha jirka, waxa uuna xanuunkiisu daranyahay habeenkii, waxyaabaha sababa waxaa ka mid ah fallaaraha raajada.

Saruuradow: Cudur uu sababo hilib cunid la'aanta muddo dheer. Saruuroow, roobsugow, hilbow.

Sas: Naxdin ama cudur dhimireed qofka ka dhiga in uu wax si gaar ah uga cabsado ama uu ku lallabboodo.

Sayanooko-baalamin: Madoobaashada maqaarka jirka oo uu sababa ogsijiinka oo ku yaraada dhiigga, amaba madoobaashada meel uusan sifiican dhiiggu u gaareyn.

Seed: Xanuunka nudaha isu hayo murqaha iyo lafaha iyo kalagoysyada ee fuliyo amarradda dhaqadhaqaaqa.

Seyntik: Xaalad cudureed oo hunguriga ku dhacda oo qirada qeybtiisa hoose yareysa taasi oo majaxaabisa in ay cuntadu gaarto caloosha, marka raajo lagu baaro waxaa kasoo muuqanaya wax u eg seynta tigga ama gafuur shimbireed.

Shaasho: Cudur ka dhasha nafaqadarrada oo carruurta iyo ummulaha ku dhaca.

Shaki: Cudur ama jirro ku timaada qofka ka shakiya cunnada, cabitaanka iyo waxwaliba oo dadka kale agtooda ka yimaada.

Shaqiiq: Cudur madaxa ku dhaca oo qofka qaba uu ilkaha isku riigo.

Shaqiiqato: Xanuun laga dareema dhinac ka mid ah madaxa sid dhafoorka. Goonjab.

Sheelo: Kiishka xiniinyaha oo weynaada midhicirka oo soo gala awgeed.

Shigshig: Xaalad inta badan lagu dhasho oo qofku uu hadalka uusan awoodin in uu xiriiriyo, hadalkiisuna waxa uu noqdaa mid go'go'an.

Shimbir: Cudur ku dhaca dadka iyo xoolaha oo afka qalloociya.

Shoog: Xaalad cudureed oo ka dhalata cadaadiska iyo qulqulka dhiigga oo hoos u dhaca kaddibna uu gaariwaayo nudayaasha.

Shookad: Bar yar oo cad oo isha dhexdeeda (birteeda) ku samaysanta.

Shuban: Saxaro jilicsan ama biyo ah oo si xiriir ah qofka kaga timaado taasi oo uu sababo cudur, bakteeriya ama waxyaaba kale, haddii uu sii socdo waxaa ka

dhalankara fuuqbax, kaasi oo ah nafaqada iyo cusbada oo jirka ka dhamaata, waxa ayna sababikartaa dhimasho dagdag ah.

Shulug: Sixir, tafaaful, katatbi.

Shuush: Cudur.

Sixasho: Cuntada ama biyaha oo ku sibqada qeybta hawada ee dhuunta.

Sixir: Farsamo qof lagu dhibaateeyo ayada oo la adeegsanayo jin, shayaadhiin, dhir, adkaar iyo gudaafad/qashin. Shulug, tafaaful, katatbi.

Sokorow: Cudur dadka ku dhaca oo kaadida maceeya oo gaajo iyo harraad badanna keena, waxa uuna ka dhashaa marka uu kulukowsku ku bato dhiigga taasi oo ka dhalata marka beeryaruhu uusan soo daynin dheecaanka insiimka ee sokortaasi u baddalilahaa tamar, kaddibna qashin saar ahaan ayaa loo raaciyaa kaadida.

Sulufaad: Baqdin iyo carar uu fudeyd ku jiro. Salaaf. Biinan. Bayr.

Sun: Walxo adke ama dareere ah oo noolaha cuna ama ay jirkiisu galaan uu dhinto, waxaana ka mid ah sun dhireedda sida dhunkaasha.

Sunbay: Cudur ku dhaca beeryaraha aadanaha. Beeryaro, weled.

Suruciyo: Mid kamid ah xanuunnada dhimirka oo leh gariir iyo lulasho.

Suus: Cudur ilkaha ku dhaca oo bololiya waxaana sababta bakteeriya.

Suuxdin: Xaalad miyirbeel ah oo ka dhalata dhibaato ka jirta maskaxda oo si kadis ah kaga kacaan mowjado koronkiimika ah taasi oo majaxaabisa habsama usocodkii shaqada maskaxda, inta badan waxa ay jirtaa daqiiqado ah.

Taag: Cudur joojiya dhaqdhaqaaqa addimmaha.

Taalaaseemiya: Cudur la iska dhaxlo oo saameeya unugyada dhiigga cas, waxa uuna ku badanyahay waddamada badda dhexe, waa cudur ka dhasha cillad ka jirta hiddasidaha (jiinka) waxa uu keenaa in maaddada himoglobiinka dhiigga cas ay awoodiweyso howsheedii kaddibna waxaa halkaasi ka dhasha dhiigyari.

Tacbaan: qof daal ama xanuun la liita.

Tacluus: Xanuun raaga oo qofka turuqdiisii baabi'iya. Bugto.

Tafaaful: Sixir, katatbi, shulug.

Taftaaf: Cudur dhallimeystay oo mudda dheer qofka hayay.

Tarakooma: Cudur indhaha ku dhaca oo la is qaadsiiyo oo ay keento bakteeriya, waxa uuna leeyahay sababta ugu badan ee indhabeelka keenta.

Tarar: Dildillaac ku yimaada lafaha ama jirka.

Tariib: Nabro yaryar oo jirka kasoo baxa oo laga qaado dhirta caanaha leh qaarkeed.

Tawin: Cudur qofka ku raagay.

Taws: Dandarro, tabaryari iyo diifta calaamadda u ah cudur.

Teeriyotambuuri: Cudur ku dhaca qanjirrada dhuunta oo barariya.

Qaamowqanshiir, canbafuuf.

Teetano: Cudur aan si toos ah la isu qaadsiinin oo ka dhasha jeermis jirka ka gala meel dhaawac ah, waxaana ka dhasha sun daran oo dhiigga raacda kaddibna si daran u saameysa murqaha kana joojisa dhaqdhaqaaqa ee togta ama kojisa. Toddobamagaarto, kujiye, kojiye, qalabiso, dhakabiye, kalaamidiyo.

Tiifoow: Cudur ku dhaca mindhicirrada oo uu keerno jeermis deegaansada midhicirrada iyo dhiigmareenka, waxa uuna leeyahay finiinac maqaarka ah, madax xanuun, caloolxanuun, shuban iyo matag.

Tiifowga maqaarka: Cudur uu sababo jeermis u dhaxeeya fayrus iyo bakteeriya oo loo yaqaanno rekatsiya kaaso oo inta badan ka dhasho saxarada injirta, waxa uuna leeyahay qandho iyo maqaarka oo gaduuto iyo nabro jirka dhan kasoo yaaca.

Tinmood: Cudur timaha ku dhaca.

Toddobamaggaarto: Cudur aan si toos ah la isu qaadiinin oo ka dhasha jeermis jirka ka gala meel dhaawac ah, waxaana ka dhasha sun daran oo dhiigga raacda kaddibna si daran u saameysa murqaha kana joojisa dhaqdhaqaaqa ee togta ama kojisa. Teetano, kujiye, kojiye.

Toxob: Qolof cad oo madaxa yeesho marka uu basaaso. Agool, rabboow.

Tufow: Jirro dadka iyo xoolaha ku dhacda oo lafo xanuun leh oo riixriixidda lagu daaweeyo. Riix, roomaatisam, tuf.

Tuf-xubno-holac: Roomaatisam/tuf/riix noociisa labaad oo kalagoysyada laga dareemo hur iyo xanuun.

Tulux: Buro weyn oo buluqbuluq ah oo jirka kasoo baxda.

Tuutuu’: Nabar kasoo baxa halka ay iska qabtaan baarka iyo dahaarka isha waxaana keenta bakteeriya. Abuu tuutuu. Hordiyuulam.

Tuur: Xoodsanaan iyo qallooca dhabarka ama lafdhabarka ah. Dhabar-xoodnaan.

Ufaayow: Cudur raagay oo muddo dheer qofka haya.

Ummi: Qof aan wax aqrinkarin, qorinnakarin amaba aanan hadlikarin. Aflaawe.

Ummulow: Cudur ku dhaca dumarka ummusha ah.

Ummusibyaan: Nooc kamid ah qallalka oo ku dhaca carruurta xilliga ay umusha ku jiraan.

Uris: Cudur carruurta ku dhaca oo madaxa ballaariya oo dadkii hore ay dab ku daaweynjireen.

Urug: Cudur xun oo la is qaadsiiyo oo ku dhaca sida badan sambabbada dadka, xoolaha iyo shimbiraha waxaana keenta bakteeriya waxa uuna leeyahay qandho, qufac wata xaaqo dhiig lasocdo, madax-xanuun, tabardarro, dhidid habeenkii ah iyo gariir. Qaaxo, feero, feero-sanbab.

Urugo: Uurkutaallo, tiiraanyo, caloolxumo.

Uurweynaad: Cudur dadka ku dhaca oo beeryarada barariya, uurkana weyneeya. Caloolweynaad, bu'a, weled. Waxaa kale oo lagu magacaabaa cudur asal ahaan ka dhashaqa nafaqadarro oo caloosha barariyo oo afka qalaad lagu yiraahdo kawaashiyoorkoor.

Uuryaal: Xanuunka ay dareento haweeney umushay maalmo kaddib marka minku uu isku soo uruurayo.

Waalli: Xaalad maskaxeed ka mid ah cudurrda dhimirka oo ka dhalata cudur ama jinni waxyeelleeya aadanaha taasi oo qofka ka dhigta mid aanan waxba kala soocikarin, garaad laheyn, is-daneyneynin, mararka qaarna uu colaad u qaadayo dadka.

Wadaaddo: Jinniyo la rumeysanyahay in ay qofku ku keenaan cudur oo si loogaga baaqsado lasiiyo raashin uu cunayo qofka ay ku jiraan ama ay la joogaan. Fiqiburaale, ardooyin.

Wadna-qabad: Xanuun xagga wadnaha ah.

Wadna-wareen: Xanuun ka yimaada qeyb kamid ah murqaha wadnaha oo ka dhimata kaddib marka uu gaariwaayo dhiigga, waxaa kale oo uu ka yimaadaa dhuuqsamidda mid kamid ah xididdada dhiigga gaarsiiya wadnaha, waxaana yimaada xanuun laga dareema naaska bidix hoostiisa, mararka qaar waxa uu ku faafaa qeybaha bidix ee garabka, gacanta iyo qoorta. Anjayna.

Wajac: Xanuun yar. Fahmadarro.

Wajiin: Caajiska habeenkii uu qabowgu jirka ku keeno.

Walaac: Walwal iyo murugo.

Wallac: Xanuun, juucjuuc iyo lallabbo mararka qaar matag aan badneyn leh oo ku dhaca dumarka bisha ugu horreysa ee uurka mararka qaarna waxaa dhacda in haweeneydu iyo ninka qaba ay jamato ama ay nacdo.

Walwal: xaalad murugsanaan iyo walaac ah oo qofka soo wajahda marka uu dhib taabto, waxa uuna sababikaraa cudur maskaxeed iyo cudurra kale sida kacsanaanta dhiigga. Welel, walaac, walbahaar, werwer, warwar.

Waniin: Nabra yaryar oo madaxa kasoo baxa.

Waraabow: Cudur ka mid ah cudurrada galmada oo si weyna la isu qaadsiiyo, waxaana keenta bakteeriya, waxa uuna leeyahay barabaro ama boogo ku sameysma jirka iyo jeexjeex cagaha ah oo aan badneyn. Isfiillito, xabbad, bajo, dhurwaayow.

Waraay: Labada indhood oo ay mid yartahay.

Waraf: Walwal ama xanuun lala seexan waayay. Weref.

Waraq: Cudur halis ah oo asal ahaan ku dhaca doolliga/jiirka kaddibna booddada ayaa usoo gudbiso dadka, waxa uu waraqda iyo kilkilaha kasoo saaraa nabro waaweyn, waxaana lagu tiriyaa bahda daacuunka. Beste.

Wareen: Nabar, dhaawac ama dhibaato jirka soo gaarto.

Wareento: Cudur xanuun kulul leh oo badanaa ku dhaca feeraha. Burukiito, qaarjeex.

Wareer: Xaalad qofka uu maleynayo in waxa hareerrahiisa ah ay wareeganayaan taasi qofka ka dhigta in uu asaguna waayo is-celintiisii iyo is-jiheyntiisii, waxaana sababa dhiigyari xagga maskaxda ah ama ogsijiinka maskaxda oo yaraata, taasi oo keenta hoos u dhaca cadaadiska dhiigga. Madaxwareer, Madax-xanuun.

Waswaas: Xaalad histeriyada ka mid ah oo qofka ka dhigta in aysan u sahlanaanin go'aan qaadashada amaba uu sas iyo baqdin ka qaado wax uu sameynlahaa. Shaki, isla-hadal, labalabeyn.

Weelduw: Cadur ama karantiin lagu sameeyo qaba cudur la isqaadsiiyo oo weel gaar ah loo yeelo. Faquuq. (Faquuq karantiimid ah).

Weershe: Cillad ay indhuhu yeeshaan oo qofka halka uu fiirinayo meel ka duwan ay indhuhu u jeedaan.

Weled: Beeryarada oo jirrata aadna u bararta. Bu'a, uurwenaad, caloolweynaad, sunbay, beeryaro. Waxaa kale oo lagu magacaabaa cudur asal ahaan ka dhashaqa nafaqadarro oo caloosha barariyo oo afka qalaad lagu yiraahdo kawaashiyoorkoor.

Weyd: Caatanimo ay keentay nafaqadarro ama jirro.

Wiiro: Xanuun uurka la iskugu hayo oo isla qofka dhib u geysata. Cuqdad.

Xabbad: Cudur ka mid ah cudurrada galmada si weyna la isu qaadsiiyo, waxaana dhalisa bakteeriya, waxa uuna leeyahay barabaro ama boogo ku sameysma jirka. Waraabow, isfiillito.

Xabeeb: Xaalad inta badan lagu dhasho oo ah codka oo doorsooma ama qofka codkiisu uusan fasiix aheyn, waxaana keena dhibaato ka jirta xubnaha codeeyayaasha ah.

Xaliib: Cudur ku dhaca labada xidid ee dhiigga qaada oo carrabka hoostiisa mara.

Xanfaf: Xanuunka yar ee laga dareema nabarka ama dhaawaca.

Xanuun: Dareenka uu dareemo noolaha ay lasoo darista caafimaad darro taasi oo naoqonkarta cudur, nabar, dhaawac, ama sun gashay jirka, waxaa kale uu qaataa magaca cudur iyo caafimaad darro, fayooobi la'aan, bugto iyo jirro.

Xanuunka dhagta dhexe: Xanuun qeybta dhexe ee dhagta ah kana danbeyso cakaarka, waxaana sababa fayrus, waxa uuna keenaa xanuun dhagta dhexe ah, culeys maqalka ah, dhuun xanuun, mararka qaar shuban iyo matag.

Xasaasiyad: Xanuun jirka iyo maqaarka ku dhaca oo ka dhasha falcelinta uu jirku kaga hortagayo walxo dibadda uga yimaado. Allarji.

Xasad: Quuriwaayidda nicmada qof kale uu alle ugu deeqay

Xididxanuun: Xanuun yar oo meel jirka ka mid ah laga dareemo.

Xiniin-holac: Hur iyo xanuun laga dareemo xiniinyaha waxaana uu keenaa barar iyo casaan daboolka xiniinyaha ah iyo xanuun dhanka manimareenka ah.

Xiiq: Xaaladsi kada ah ku dhacda oo tubbooyinka neefmareeka ay dhuuqsamaan taasi oo keenta culeys xagga neefsiga ah.

Xiiqdheer: Cudur badanaa carruurta ku dhaca oo leh qufac, neefraac iyo matag. Qiixdheer, hiiqleey

Xinjirow: Dhiigga oo yeesha xinjir taasi oo habsaamisa qulqulka dhiigga keenikartana dhimasha kadis ah.

Xinjir-roor: Xaalad uu dhiigu isu baddalayo adke, waxa ayna sababtaa in dhiiggu uu mariwaayo xididdada maadaamo ay xinjir fadhiisatay taasi oo keenta in halbowluhu uusan helin dhiig ku filan, xaaladdaasi waxa ay keenikaraa dhibiib, faalij ama wadnaxanuun.

Xog: Yamcuur ama nabra gadgaduudan oo dhuunta kasoo baxa, reer miyigu waxa ay ku daaweynjireen gubitaan ama ayada oo qori lagu xogo oo ugu yaraan la dhiidhiijiyo.

Xoqato: Xanuun qanjirrada afka salkiisa ku yaalla ku dhaca. Majin, majinow, quun, qun.

Xorre: Cudur boogo fashfasha leh oo ku dhaca faraha fooddooda oo xanuun badan leh. Xarre.

Xubin-dhac: Xubin ama nude ka guura halkiisii caadiga aheyd oo uu ku sugnaanjiiray, waxaana keen waxyaabihii meesha ku haynjiiray oo daciifa amaba meesha ka baxa.

Xubna-holac: Hur laga dareemo kala goysyada jirka mid ama inbadan oo kamid ah.

Xummad: Xanuun jirka laga dareema oo uu sababo cudur, dhaawac, nabar, sun ama jeermis galay jirka ama waxyaaba kale, xaaladdaasi waxa ay sare u qaaddaa heerkulka jirka oo gaara 37° C iyo wax ka badan. Jirro, qandho.

Xundhur: Cudur la is qaadsiiyo oo ku dhaca midhicirraha waxa uuna keenaa shuban ay la socdaan dhiig iyo axal.

Xundhur-ameebeed: Cudur ku dhaca midhicirrada oo uu keeno dariskunoole waxa uuna dhaawacyo u geystaa midhicirrada.

Xundhur-bakteeriyeed: Cudur ku dhaca midhicirraha oo ay keento bakteeriyada shigeellada, waxa uuna leeyahay qandho, lallabbo iyo shuban.

Yamcuur: Nabra aad u yaryar oo jirka ama mqaarka kasoo baxa.

Yirid: Cudur ku dhaca ilkaha oo cirridka dhiidhiiyiya. Yerid.